

Buugyaraha Xuquuqda iyo Masuuliyadaha Ardayda Dugsiyada Dadweynaha Portland ee 2023-2024



Qallinjebiyaha Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa uu noqon doonaa mid qaab naqdin leh u feker a oo naxariis badan, awood u leh in uu iskaashi sameeyo oo uu xalliyo mashaakilka, oo u diyaarsanaado in uu hoggaamiyo duni sida hadda ka caddaalad badan.

JADWALKA MAWDUUCYADA

QIYAMKA AASAASIGA AH	4
XUQUUQDA IYO MASUULIYADAHA ARDAYDA IYO DARYEELEYAASHA.....	5
NIDAAMKA TAAGEERADA HEERARKA BADAN	8
CADAALADDA HAGAAJINEED:	9
WAXBARASHADA BULSHO SHUCUUREED:.....	9
GUUSHA IYO CAAFIMAADKA ARDAYGA.....	10
ARDAY WALIBA WAA KAMID.	10
QIIMEYNTA AMMAANKA HABDHAQANKA	10
DEEGANO WAXBARASHO OO CAAFIMAAD QABA OO KA MADHAN MAANDORIYEYAASHA... 11	
HAGAHA TAAGEERADA KALA DUWANAANTA JINSIYEED	11
QORSHEYAASHA IS-DHIBAATEYNTA, ISDILKA, iyo AMMAANKA	11
CINWAANKA IX.....	12
XAADIRITAANKA	14
PARENTVUE	14
ISKU XIGXIGITAANKA ANSHAXMARINTA.....	14
HAWLAHA KA BAXSAN MANHAJKA	15
BASASKA DUGSIGA	16
TIKNOOLAJIYADDA	16
FILASHOOYINKA DIRAYSKA IYO LEBISKA.....	17
ANSHAXMARINTA:	16
BAADHISAHA HANTIDA.....	18
SHAXDA HABDHAQANKA	20
NOOCA I.....	20
NOOCA II.....	21
NOOCA III.....	24
NOOCA IV	27
TALLAABOYINKA ANSHAXMARINTA EE KHAMRIGA/DAROOGADA	30
ANSHAXMARINTA KA REEBISTA	33
HABRAACYADA HAKINTA.....	33
HABRAACYADA DHEGAYSIGA ANSHAXMARINTA.	33
ANSHAXMARINTA ARDAYDA NAAFADA AH.....	34
HANNAANADA RACFAANNADA	34
QEEXITAANO	35

Ingiiriisi Buugyarahan sidoo kale waxa laga heli karaa dugsigaaga isaga oo ku qoran luuqadaha soo socda: Isbaanish, Raashiyaan, Fiitnaamiis, Jayniis iyo Soomaali. Si aad caawimaad dheeraad ah uga hesho fasiraadda ama turjumaadda luuqadaha, fadlan wac 503.916.3427

Jayniis 您的学校还提供本手册的以下语言版本：西班牙文、俄罗斯文、越南文、中文和索马里文。如需更多语言口译或笔译方面的帮助，请致电503.916.3427。

Fiitnaamiis Quyền sách hướng dẫn này có sẵn tại trường học của con em quý vị trong các ngôn ngữ sau đây: Tây Ban Nha, Nga Xô, Việt Nam, Trung Hoa, và Somali. Để được trợ giúp thêm về việc giải thích hoặc thông dịch các ngôn ngữ, xin vui lòng gọi điện thoại số 503.916.3427.

Isbaanish Este manual también está disponible en su escuela en los siguientes idiomas: español, ruso, vietnamita, chino y somalí. Para obtener más ayuda con la interpretación o traducción de idiomas, por favor llame al 503.916.3427

Soomaali Buug-yarahan waxaa sidoo kale laga heli karaa dugsigaaga isagoo ku qoran afafka: Isbaanishka, Ruushka, Fiitnaamiiska, Shiinaha, iyo Soomaaliga. Wixii gargaar dheeraada ee la xiriira af-celinta ama turjumaanka luqadaha, fadlan wac 503.916.3427.

Raashiyaan: Это руководство доступно в вашей школе на следующих языках: испанском, русском, вьетнамском, китайском и сомалийском. Для получения дополнительной помощи с устным или письменным переводом, пожалуйста, звоните по телефону 503.916.3427.

Qiyamka Aasaasiga ah

Ardayda ku sugan Xarunta: dhammaan ardaydu waxa ay awood u leeyihiin inay guulaystaan; waxa aanu dedaal ugu jirnaa inaanu saameyn togan ku yeelano ardayda, waxana aanu bud-dhig uga dhignaa go'aan iyo tallaabo kasta oo aanu qaadayno yoolkan. Waxa aanu aaminsanahay in codka ardaydu uu daruuri u yahay fahanka iyo xallinta mashaakilka aasaasiga ah ee waxbarashada; sidaas darteed ka qaybgelinta codka ardaygu waa mudnaan.

Sinnaanta Qowmiyadeed iyo Cadaaladda Bulsheed: xaq aasaasiga ah ee sharafta aadanaha iyo abuurista duni sinnaan leh waxa ay u baahan tahay nidaam waxbarasho oo si qorshaysan u carqaladeeya isla markaana dhisa hoggaamiyeyaal carqaladeeya nidaamyada dulmiga.

Daacadnimada iyo hufnaanta: muujinta daacadnimo iyo hufnaan tallaabo kasta oo aanu qaadno, oo ay dheer tahay xidhiidh iyo go'aan-qaadasho ay ku dheehan tahay runsheegnimo, akhlaaq-wanaag, daahfurnaan, iyo isla xisaabtan aanu ka muujino marka aanu u adeegayno ardaydayada, qoysaskayaga, shaqaalahayaga, iyo bulshadayada.

Heersarreyn: heerarka adag ee sarreeya ee dhammaan ardayda iyo shaqaalaha, iyo hirgelinta heersarreyn iyo waxqabad sarreeya waa natijada nidaamka dugsiga ah hay'ad waxbarasho oo joogto ah.

Ixtiraam: ixtiraamka dhammaan dadka. Qof waliba waxa uu soo kordhiyaa qiime waxana uu u qalmaa in si daryeel, hufnaan, iyo naxariis leh loola dhaqmo.

Xidhiidhada: xidhiidhadu waxa ay muhiim u yihiin guushayada. Xidhiidhka aadanaha ee daacadda ah, ee ku dhismay xidhiidhada dhibirsanaanta ku salaysan, ee daryeelka leh, waxa uu dhisaa kalsoonida, waxa uu dardargeliyaa isfahanka, waxana uu xoojiyaa awoodda aynu u leenahay inaynu ka wada shaqayno yoolal aynu wadaagno.

Halabuurka iyo Cabqarinimada: awoodda xallinta mashaakilka ee wax ku oolka ah oo lagu taageeray dhaqanka halabuurka iyo cabqarinimada. Carinta wax iska maleynta, kobcinta wax is weydiinta, soo dhaweynta fekradaha cusub, iyo horumarinta xirfadaha qaab cusub u fekerku waxa kuwo aasaasi u ah sameynta xeeladaha wax ku oolka ah ee isbeddelka togan.

Shuraakooyinka iyo Iskaashiga: inaga oo wadajir ah, waxa aynu ognahay inaynu hirgelin karno wax badan, marka aynu ka faa'iidayano ficillada daneeyeyaal ka go'naansho leh oo wadar ahna, waxa aynu hirgelin karnaa Himiladeena.

Ku Xididaystay Ruuxda Portland: aqoonsigeena Portland ee gaarka ahi waxa uu ina siiyaa xikmad kooxeed oo aynu ku qirno oo wax kaga barano taariikhda kala duwanaansho ee bulshadeena isla markaana shidaal uga dhigno tallaabadeena kooxeed ee halabuur ee aynu ugu abuurayno Portland sidan ka wanaagsan dhammaan dadka.

Waxbarasho iyo Hoggaamin Farxad Leh: waxbarashada iyo hoggaaminta ah qaabab dardargeliya xidhiidhka aadanaha, qaddarinta qotoda dheer ee la isku hayo, ku qanacsanaanta shaqadayada, iyo qaddarinta hannaanka waxbarashada.

PPS, waxa aanu aaminsanahay arday waliba in uu xaq u leeyahay in uu galaangal u helo waxbarasho loo siman yahay. Si aanu u gaadho yoolkan waxa aanu aaminsanahay in aanu bartilmaameedsano oo aanu wax ka qabashooyin siino ardaydayada ah Madawga iyo Kuwa Dhulka loogu Yimi, anaga oo fahansan in marka aanu carqaladeyno natiijooyinkan lasii saadaalin karo ay

dhammaan ardaydayadu heli doonaan khibrad waxbarasho oo ka sinnaan badan sida hadda.

XUQUUQDA IYO MASUULIYADAH A ARDAYDA IYO DARYEELEYAASHA

Ardayda Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa laga filayaa inay noqdaan kuwo ammaan ah, ixtiraam badan, oo masuul ah. Ardayda waxa laga filayaa inay u dhaqmaan qaab macallimiinta u sahlaya inay wax dhigaan ardaydana inay wax bartaan.

ARDAYDA waxa ay xaq u leeyihiin inay:

- Waxbarasho tayo leh oo soojiidasho leh oo ku baxda deegaan ammaan ah oo raaxo leh.
- Kala hadlaan macallimiinta, la taliyaha, iyo shaqaalaha kale ee dugsiya wixii walaacyo ah.
- Helaan anshax-marin caddaalad ah oo aan takoor lahayn.
- Soo sheegaan wixii dhacdo ee ah gardarreysi, dhibaataayn, xadgudub, iyo handadaad hadal ama jidheed isla markaana ogaadaan in tallaabo laga qaadayo.
- Galaangal u helaan diiwaanadooda wixii waafaqsan tilmaamaha habboon.
- Ku helaan macluumaadka anshax-marinta luuqad ay fahmi karaan.

Adiga waxa ay masuuliyadi kaa saaran tahay inaad:

- Si joogto ah usoo xaadirto dugsiya, timaaddo wakhtiga munaasabka ah, soo qaadato agabka habboon, isla markaana aad usoo diyaargarawdo inaad ka qaybqaadato fasalka oo aad ka shaqayso layliska.
- Ixtiraamto xuquuqda, dareenada, iyo hantida ardayda kale, waalidiinta/daryeeleyaasha, shaqaalaha dugsiya, booqdeyaasha, martida, iyo jaarka dugsiya.
- Si ixtiraam leh u dhaqanto marka aad ku sugan tahay dhulka dugsiya, basaska dugsiya, meelaha basaska lagu sugo, hawl dugsiya la xidhiidha, iyo fasalka si aad uga fogaato inaad carqaladayso hannaanka waxbarasheed.
- Raacdo filashooyinka fasalka, dugsiya, iyo Degmada.

Xuquuqda Ardayda ee Gaarka ku ah Aqoonsiga Jinsiyeed & Cabiraadda Jinsiyeed:

Dhammaan ardayda Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa ay xaq u leeyihiin in:

- Aanay qarsan aqoonsigooda marka ay dugsiya joogaan iyo inay helaan fursado waxbarasheed iyo hodmin ay ku xaqiijinayaan aqoonsigooda dhaqan.
- Ay helaan qarsoodinimo ku xeeran jihadooda galmeed iyo aqoonsigooda jinsiyeed.

- Loola dhaqmo si sinnaan leh oo aanay la kulmin gardarreysi, dhibaatayn, iyo takoor, iyada oo aan la eegayn jihada galmeed, aqoonsiga jinsiyeed ama cabiraadda jinsiyeed. Ay soo sheegaan gardarreysiga ama dhibaataynta iyaga oo aan ka baqayn wax cawaaqib ama aargoosi ah iyo in sheegistaas ay masuulladu tallaabo ka qaadaan.
- Ay caddeeyaan aqoonsigooda jinsiyeed marka ay dugsiga joogaan iyo in loogu yeedho magaca iyo magac u yaallada waafaqsan aqoonsigooda jinsiyeed.
- Ay galaangal u helaan musqul iyo qol khaanadeed waafaqsan aqoonsigooda jinsiyeed ee ay caddeysteen, iyo in si kale wax loogu qabanqaabiyo marka ay u lebbisanayaan PE ga haddii aanay ku qanacsaneyn qolka khaanadaha.
- Ay ka qaybqaataan PE ga iyo isboortiga waafaqsan aqoonsigooga jinsiyeed. Laga kaalmeeyo go'aansashada aagga PE ga iyo/ama isboortiga ee ku habboon iyaga inta ay ku jiraan hannaana kala guurka.
- Ay xidhaan dhar cabbiraya aqoonsigooda jinsiyeed (inta uu raacayo sharciga dharka PPS, kaas oo khuseeya dhammaan ardayda iyada oo aan la eegayn jinsi).
- Aanay qarsan aqoonsigooda inta ay dugsiga joogaan. (Iyo sidoo kale, in aqoonsigooga laga dhigo qarsoodi haddii ay doortaan in sidaas la sameeyo).
- Iyaga oo aan u baahneyn ogolaansho waalid, ardaydu waxa ay beddeli karaan magaca ay doorbidaan ee ku jira nidaamka macluumaadka dugsiga.
- Iyaga oo ogolaansho ka qaadanaya waalidka, ardaydu waxa ay beddeli karaan calaamaddooda jinsiga ee lab, dheddig, ama jinsi-laawe ee ku jirta nidaamka macluumaadka dugsiga. Dhammaan waxa loo baahan yahay si beddelkan loo sameeyaa waa codsi qoraal ah oo sheegaysa in sidaas la sameeyo, iyada oo la adeegsanayo [Foomka Beddelka Magaca & Jinsiga](#). (Haddii ardaygu aanu ogolaansho waalid u helin beddelkan, weli waxa ay xaq u leeyihiin in loogu yeedho magaca iyo magac u yaallada waafaqsan aqoonsigiisa jinsiyeed).

Waalidiinta/Daryeeyaashu waxa ay xaq u leeyihiin in:

- Ay warbixino rasmi ah oo joogto ah ka helaan horumarkaaga akaadeemiyadeed iyo soo xaadiraankaaga.
- Ay bixiyaan talooyin oo dhiibtaan ra'yiga ay ka qabaan qorshaynta waxbarasheed.
- Ay ka qaybqaataan shirarka lala yeelanayo macallimiinta iyo/ama maamulka.
- Ay macallimiintaada ka helaan sharraxaado ku saabsan dhibcahaaga.
- Ay galaangal u helaan dhammaan diiwaanada dugsigaaga wixii waafaqsan tilmaamaha habboon.
- Ay faahfaahin dheeraad ah ka helaan xuquuqda, masuuliyadaha, iyo anshax-marinta ardayga.
- Ay ku helaan macluumaadka anshax-marinta luuqad ay fahmi karaan.
- Ay kaga helaan xidhiidhada qoraalka ah iyo kuwa hadalka ah dugsigaaga luuqad ay fahmi karaan.

Waalidkaaga/daryeelahaagu waxa uu masuul ka yahay:

- In uu ka kaalmeeyo shaqaalaha dugsiga isaga oo la wadaagaya fekrado lagu horumarinayo waxbarashada ardayga oo lagaga hortagayo oo lagu xallinayo mashaakilka anshaxeed ee ardayga.
- In uu kormeero badqabkaaga caafimaad, jidheed, iyo shucuureed.
- In uu xaqiijiyo in soo xaadiraankaagu degdeg yahay oo joogto yahay isaga oo sidoo kale dugsiga siinaya sharraxaado ah maqnaanshiyahaaga ama habsankaaga.
- In uu soo xaadiro shirarka waalidka/daryeelaha.
- In uu si munaasab ah kuu kormeero adiga kahor iyo kadib dugsiga.

- In uu dib kuula eego oo kaala doodo xuquuqda, masuuliyadaha, iyo anshax-marinta ardayga.
- Inay taageeraan barnaamijyada dugsiga ee is-xakameynta iyo xallinta khilaafaadka.

GANAAXYADA IYO FIIYADA: ganaaxyo ka dhasha buugta ama qalabka dugsiga ee waxyeelooba ama luma ayaa lasoo dallici doonaa. Diiwaanada iyo dhibcaha dugsiga waa la joojin karaa illaa kharashka la bixiyo.

AMMAANKA CUNTADA: Gobolka Oregon waxa uu leeyahay sharciyo adag oo la xidhiidha ku adeegsiga iyo ku diyaarinta cuntada goobo dadweyne sida dugsiyada. Cuntooyinka fasallada waxa loo soo diyaarin karaa keliya qaab ganacsiyeed. Cuntooyinka waa in loo soo duubo qaybo qof-qof ah oo aanay wadaagin ardaydu. Ardaydu ma wadaagi karaan cuntada qadadooda ee ay kasoo qaateen guriga.

XORRIYADDA HADALKA IYO ISKU IMAATINKA: sida ay dhigayaan sharciga gobolka iyo Federaalka, siyaasadda Degmada, iyo tilmaamaha dugsiga, ardaydu waxa ay xor u yihiin hadalka iyo isku imaatinka waafaqsan Wax Ka Beddelka Koowaad "First Amendment".

HANTIDA LUNTA, LA XADO, WAXYEELAWDA: PPS ma bixiso kharashka umana beddesho hantida ardayga ee ku lunta, lagu xado, ama ku waxyeelawda dugsiga. Dhammaan agabyada, ay kamid yihiin elegtarooniga, baaskiiladaha, iyo skateboards ka, waxa dugsiga loo soo qaataa iyada oo qofka iska lihi masuul ka yahay waxa soo gaadha. Khaanaduhu ma aha goobo ammaan ah oo la dhigan karo agabyada qaaliga ah.

XAALADHA DEGDEGGA AH EE CAAFIMAAD: hadba sida ay daruuriga u tahay, dugsigu waxa uu dalbi doonaa kaalmo caafimaad iyada oo kharashka lagu dallacayo waalidka/daryeelaha.

DAAWOYINKA: haddii arday uu ku qasban yahay in uu daawo ku qaato dugsiga, waalidka/daryeeluhu waa in uu u geeyaa maamulaha ama shaqaalaha u xilsaaran. Qofka qaadaya daawada waxa uu u sharxi doonaa shuruucda waxana uu u qabanqaabin doonaa xubin shaqaale ah oo munaasab ah oo siiya ardayga daawada. Daawo kasta waa inay ku jirto caagga magacu ku qoran yahay ee asalka ah. Ardaydu waxa ay qaadan karaan daawadooda iyaga oo maraya shuruudo xaddidan oo gaar ah balse waa in uu la hubiyo macallinku ugu horreyn.

DIWAANADA ARDAYDA: dugsigu waxa uu hayaa diiwaanada arday walba. Kuwani waa diiwaanada horumarka akaadeemiyadeed ee ardayga, habdhaqanka ardayga, iyo wixii macluumaad ah ee kale ee ku saabsan ee xidhiidhka la leh ardayga. Diiwaanadani waa qarsoodi. Diiwaanada ardaygu waxa ay macluumaad siiyaan dadka ay kamid yihiin shaqaalaha dugsiga iyo waalidiinta/daryeelayaasha. Waalidiinta/daryeelayaashu waxa ay leeyihiin xuquuq la xidhiidha diiwaanada ardayga, oo ay kamid yihiin xaqa eegitaanka diiwaanadan iyo codsiga wax ka beddel lagu sameeyo diiwaanada. Badanaaba waxa ay su'aalo u gudbin karaan maamulaha.

TAAGEEROOYINKA DEGMADA

NIDAAMKA TAAGEERADA EE HEERARKA-BADAN

Nidaamka Taageerada ee Heerarka-Badan (MTSS): waa qaabdhismeed diiradda lagu saarayo ka hortagga iyo xallinta mashaakilka ee dhammaan ardayda iyada oo la adeegsanayo go'aan-qaadasho ku salaysan xog. MTSS waxa uu adeegsadaa waxdhigis caddeyn-ku-salaysan, dhaqano wax ka qabasho iyo qiimeyn si loo xaqiijiyo arday waliba in uu helo heerka habboon ee taageerada oo ku salaysan heerkiisa baahida. Nidaam taageero oo heerar leh oo xooggan waxa uu ku bilaabmaa diirad saaridda Heerka I.

- Heerka I: waa galaangal u helid aasaasi u ah heerarka heerka-fasalka ah, waxdhigista iyo ku dhaqanka habdhaqanka, Manhajka Latalinta Aasaasiga ah, dhaqannada Waxbarashada Shucuureed Bulsheed (SEL) ee heer-dugsi, iyo ka qaybgelin bulsheed iyo goys oo dhammaan ardayda ah. Heerka I waxa uu taageeraa filashooyinka heer-dugsi, badqabka, iyo cimilada bulshada dugsiga.
- Heerka II: waxa uu ogolaadaa wakhti iyo taageero dheeraad ah oo wax lagaga baranayo heerarka heer-fasal ee mudnaanta leh, dhaqanada habdhaqanka ee aasaasiga ah, iyo xirfadaha SEL ee la bartilmaameedsaday. Wax ka qabashooyinku waxa ay ka qabsoomaan kooxo yaryar oo leh baahiyo isku mid ah. Wax ka qabashooyinka bulsheed-shucuureed ee heerka II waxa bixin kara la taliyaha dugsiga, shaqaalaha bulsheed ee dugsiga, cilminafsi-yaqaanka dugsiga, ama shaqaale taageero oo kale.
- Heerka III: Wax Ka Qabasho La Xoojiyey: Wax ka qabashooyin la xoojiyey oo qof-qof 1:1 ah (ama waxdhigis kooxeed oo xirfadaha aasaasiga ah ee akaadeemiyadda muhiimka ah oo aad u yar) oo lagu taageerayo ardayda leh xirfadaha akaadeemiyadeed ee aasaasiga ah ee dib u dhacsan, dhaqanada habdhaqan ee aasaasiga ah, baadhista, la talinta shakhsiyeed, adeegga bulshada iyo gudbinnada caafimaadka maskaxeed iyo isku duwidda daryeelka, iyo qorshaynta ammaanka iyo taageerada. Wax ka qabashooyinka xirfadaha aasaasiga ah ee akaadeemiyadda muhiimka ah.

Si aad macluumaad dheeraad ah uga hesho MTSS, fadlan booqo <https://www.pps.net/Page/15756>

CADAALADDA HAGAAJINEED: Cadaaladda Hagaajineed (RJ) waa falsafad ku qotonta aaminaadda ah in xidhiidhada togan, ee caafimaadka qabaa ay inagu caawiyaan inaynu guulaysano. RJ waxa ay ku dhiirrigelisaa dugsiyada inay joogteeyaan xidhiidhadan caafimaadka qaba waxana ay dhiirrigelisaa galaangal u helid loo siman yahay in loo helo waxbarashada munaasabka ku ah dhaqanka ee macnaha leh.

DHAQANNADA HAGAAJINEED: kuwani waa hannaano iyo xirfado inagu caawiya inaynu xidhiidho ka dhex dhiso ardayda iyo dhammaan xubnaha kamidka ah bulshada dugsiga waxana loo

adeegsadaa inay dugsiyada ka caawiyaan: Horumarinta bulshooyinka dugsigu iyo fasalka iyada oo diiradda la saarayo dhismaha bulshada iyo kor u qaadista isla xisaabtanka.

- Dardargelinta baraarugsanaanta shakhsiyeed ee ardayga ee bulsheed, diirnaxa, xidhiidhka, iyo go'aan-qaadashada masuuliyadda leh, dhisidda-xidhiidhada, iyo xallinta khilaafaadka.
- Kordhinta dareenka kamid ahaansho ee gudaha dhismayaasha dugsigu iyada oo la yareynayo khilaafka hoosna loo dhigayo mashaakilka iyada oo isla mar ahaantaa la dardargelinayo dareenka masuuliyadda bulsheed.
- Hoos u dhigidda mashaakilka iyo carqaladaha anshax-marieed.
- sida beddel macquul ah in loo sameeyo dhaqannada saarista ah sida ka hakinta iyo ka eryidda fasalka.
- Dardargelinta ka qaybqaadashada waxbarashada ee ardayga.
- Siinta ardayda fursad ay ku qirtaan oo ay ku saxaan dhibka marka ay macquul tahay.
- Shaqaalaha dugsigu waxa ay adeegsadaan dhaqannada hagaajineed marka ay awood u leeyihiin ee ay ku heshiiyaan dhammaan dhinacyadu. Qaar ah Dhaqannada Hagaajineed waa:
 - XALQADAHA DHISIDDA BULSHADA: Waxa la adeegsadaa wakhti kasta maalinta ama toddobaadka dhexdiisa si gacan looga geysto in laga dhex dhisoo kalsooni, ka mid ahaansho, iyo deegaan waxbarasho oo togan bulshada dugsigu.
 - XALQADAHA JAWAAB-CELINEED: Waxa ay siiyaan boos ardayda sida tooska ah ugu lugta leh qalalaase iyo kuwa kale ee sida tooska ah dhibku uga soo gaadhay si ay uga wada hadlaan saameynta habdhaqanka oo ay u sameeyaan qorshe lagu saxayo dhibka.
 - WADASHEEKAYSIIYADA: Wadasheekaysi aan rasmi ahayn oo la adeegsanayo su'aalo hagaajineed si ardayda looga caawiyo inay la tacaalaan dhacdada, xoojiyaan xidhiidhkooda, oo ay keenaan xal.
 - SHIR: Kulan u dhexaeya dhammaan dhinacyada ku lugta leh si ay uga wada hadlaan saameynta habdhaqanka, sixidda dhibka, iyo saameynta qorshe hawleed lagu taageerayo la socoshada.

WAXBARASHADA BULSHEED SHUCUUREED: Waxbarashada Bulsheed iyo Shucuureed (SEL) waa hannaanka carruurta iyo dadka waaweyni ku fahmaan kuna maareeyaan shucuurta, ku dejistaan oo ku hirgeliyaan yoolal togan, ku dareemaan oo ugu muujiyaan diirnax dadka kale, ku sameeyaan kuna joogteeyaan xidhiidho togan, oo ku gaadhaan go'aano masuuliyad leh.

GUUSHA IYO CAAFIMAADKA ARDAYGA

Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa ay aaminsan tahay in qof kasta oo ku sugan dugsiyadeenu uu u qalmo deegaan ammaan ah oo dardargeliya ixtiraamka, bulshada, iyo waxbarashada. Mashaakilka qaar waxa ay u baahan yihiin khibrad iyo dareen dheeraad ah, oo ay kamid yihiin is-dhibaataynta ama sameysanka fekradda isdilka iyo habdhaqanka handadaadda leh. Adeegyadan waxa bixisa Waaxda Guusha iyo Caafimaadka waxana loo sameeyey in lagu daboolo baahiyaha bulshadeena waxana ay ku salaysan yihiin tusaaleyaal la aqoonsan yahay heer qaran.

Ardayda, waalidiinta, xubnaha shaqaalaha dugsigu, iyo bulshada guud waxa ay leeyihiin dhawr qaab oo ay kusoo gudbiyaan walaacyada ammaanka:

- Inay u sheegaan macallin, xubin shaqaale ah, masuul, la taliye dugsi, kalkaaliye caafimaad, ama shaqaale bulsheed oo dugsigu ah kaas oo u bilaabi doona hannaanada Degmada hadba sida ay daruuriga u tahay.
- Inay wacaan ama farriin qoraal ah u diraan SafeOregon TipLine (Tel. [844-472-3367](tel:844-472-3367), ama limeylka, tip@safeoregon.com) si looga tago macluumaadka noqon kara qarsoodi.

- Wixii xaaladaha degdegga ah, inay wacaan 911.

ARDAY WALIBA WAA KAMID: Siyaasaddeena Bulshooyinka Waxbarasheed ee Lidka-cunsuriga & Lidka-dulmiga waxa ay caddeeyaan in jiritaanka calaamado naceyb oo ku salaysan qowmiyad, midab, diin, aqoonsi jinsiyeed, jiho galmeed, naafanimo, ama qaranka laga soo jeedo, oo ay kamid yihiin xadhiga daldalaadda, calaamadaha aragtida neo-Nazi, ama calanka dagaal Kooxeed ay ku abuuraan carqalad jidheed oo laxaad leh hawlaha dugsiga iyo deegaanka waxbarashada iyaga oo abuuraya jawi cabsi iyo baqo-gelin leh waxana ay farageliyaan xuquuqda ardayda iyaga oo u diidaya galaangal u helid buuxda oo ay u helaan adeegyada, hawlaha, iyo fursadaha uu bixiyo dugsigu. Calaamadahan laga ma ogola Dugsiyada Dadweynaha Portland, oo in lasoo bandhigo, la sawiro, ama lala wadaago dadka kale waxa ay keeni kartaa anshax-marin arday oo waafaqsan [Siyaasadda Guddiga Bulshooyinka Waxbarasheed ee Lidka-Cunsuriga & Lidka-Dulmiga ee 2.10.015-P](#).

QIIMAYNTA AMMAANKA HABDHAQANKA: (BSAS) waxa uu siiyaa xubnaha shaqaalaha ee tababaran qaab ay ku ururiyaan macluumaad, ku qiimeeyaan xaaladaha handadaadda leh, oo ku sameeyaan qorshayaal ay ku taageerayaan ammaanka. Hannaankani qayb kama aha habraacyada iyo siyaasadaha anshax-marineed ee dugsiga. Diiradda lama saarayo ciqaabta, baadhista, ama shaambadeynta ardayda balse waxa diiradda la saarayaa joogteynta deegaan ammaan u ah oo caddaalad u ah qofkasta oo kamid ah bulshada. Dugsigu waxa uu la xidhiidhaa Kooxda Qiimeynta Ammaanka Habdhaqanka (BSAT) si uu uga helo latalin iyo taageero ku aaddan xaaladaha kakanaanta iyo halista badan.

DEEGAANO WAXBARASHO OO CAAFIMAAD QABA, OO KA MADHAN ADEEGSIGA MAANDOORIYAHA: ardaydu waa inaanay ku adeegsan, ku haysan, ku wareejin, ama ku qaybin khamri ama daroogo ama waxkasta oo u eeg daroogo dugsiga dhexdiisa, ama dhulalka dugsiga dhexdooda, ama marka ay ku jiraan hawlo dugsiga ah, ama inta lagu gudo jiro saacadaha dugsiga ama inta ay ku socdaan ama kasii socdaan dugsiga. Ardayda habdhaqankoodu muujiyo inay maankooda ku dooriyeen daroogo ama khamri waxa ay la kulmi doonaan cawaaqib anshax-marineed.

Diirad saaridda Siyaasadda Deegaanada Waxbarasheed ee Caafimaadka Qaba, ee Ka Madhan Adeegsiga Maandooriyuhu waa in:

- Wax looga qabto mashaakilka la xidhiidha adeegsiga maandooriyaha sida qaab kamid ah mushkilad caafimaadka maskaxda ah oo looga jawaabo bixin waxbarasho,
- La bixiyo wax ka qabashooyin iyo taageero loogana hawlgalo yareynta anshax-marinta dugsiga, kaas oo badanaa ardayda khatar dheeraad ah u galiya inay kordhiyaan adeegsiga maandooriyaha.
- La sameeyo koox taageerooyin ah, oo ay kamid yihiin fasal loogu talagalay ardayda iyo daryeelayaashooda ama dadka waaweyn ee daryeela, galaangal u helidda latalin ku aaddan adeegsiga maandooriyaha, maareynta kiiska iyo taageero laga siiyo galaangal u helidda daaweyn bulshada dhexdeeda ah.

HAGAHA TAAGEERADA KALA DUWANAANSHAHA JINSIYEED: Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa ay u abuurtaa xidhmo-agabeedkan fudaydinada iyo tixgelinada dugsiyada, si ay u abuurto fahan wadaag ah oo ku aaddan sida dugsiyada u taageeri doono ardayda ah jinsi-beddelka, jinsi-laawaha, iyo kuwa jinsigoodu gaarka yahay. Hagaha Maamul ee Ardayda ah Jinsi-beddelka, Jinsi-laawaha, iyo Kuwa Jinsigoodu Gaarka yahay (4.30.061-AD), agabka Qorshaynta Dugsiyada PPS, Foomka Beddelka Magaca iyo Jinsiga, iyo dukumentiyada Su'aalaha Badanaa La is Weydiiyo waxa loogu talagalay inay noqdaan khayraad gacan lagaga geysanayo xaqiijinta DHAMMAAN ardaydu inay xaq u leeyihiin deegaan waxbarasho oo ammaan ah, soo dhaweyn leh, oo caafimaad qaba. Hagaha waxa laga heli karaa barta: <https://www.pps.net/Page/14123>

QORSHAYAASHA IS-DHIBAATAYNTA, ISDILKA, iyo AMMAANKA: adeeg bixiyeyaal arday oo tababaran (lataliyeyaal, kalkaaliyeyaal caafimaad dugsi, cilminafsi-yaqaano dugsi, shaqaale bulsheed dugsi, khabaro caafimaad maskaxeed oo aqoon leh, iwm.) ayaa qiimeyn kara xaaladda, ka caawin kara ardayda iyo waalidiinta inay la xidhiidhaan khayraadka taageerada iyo daaweynta, kana wada shaqeyn kara sameynta qorsheyaal ammaan. Qorsheyaashan waxa lala wadaagaa xubnaha shaqaalaha dugsiyada ah ee la doortay waxana dib loogu eegaa hadba sida loogu baahdo. Marka xaaladdu ay halisnimo badan tahay ama khayraad kale loo baahdo, dugsiyada waxa uu la xidhiidhaa Waaxda Guusha iyo Caafimaadka Ardayga. Ardaydu waxa ay bartaan sida loo aqoonsado oo looga jawaabo calaamadaha digniinta ee isdilka ee ka jira saaxiibada, adeegsiga xirfadaha la qabsiga, adeegsiga nidaamyada taageerada, iyo caawimo u raadinta nafahooda iyo saaxiibadood. Dhammaan ardayda waxa laga fili doonaa inay gacan ka geystaan abuurista dhaqan dugsiyeed oo ku dhisan ixtiraan iyo taageero kaas oo ay ardaydu ku dareemi doonaan qanacsanaan ah inay caawimo u raadiyaan nafahooda iyo saaxiibadood. Ardayda waxa lagu dhiirrigeliyaa inay u sheegaan xubin shaqaale haddii iyaga, ama saaxiib, uu dareemayo baahi isdil ama u baahan yahay caawimo.

Ardaydu waxa ay galaangal u leeyihiin khayraad qaran taas oo ay la xidhiidhi karaan si ay uga helaan taageero dheeraad ah:

<ul style="list-style-type: none"> ● <u>Laynka Musiibada ee Degmada Multnomah</u> (503) 988-4888 <ul style="list-style-type: none"> ○ Taageero caafimaad maskaxeed oo bilaash, 24/7 ah ○ Adeegyo turjumaad oo loogu talagalay dadka ku hadla luuqad aan Ingiriisi ahayn ○ Gudbin ah hay'adaha kharashka-yar ama leh kharash dalicidda lagu saleeyo dakhliga ● <u>Kaiser Crisis Line</u> (503) 331-6425 <i>Loogu talagalay kuwa leh caymiska Kaiser</i> ● <u>Youthline at Lines for Life</u> 877-968-8491 ama U dir: teen2teen lambarka 839863 <ul style="list-style-type: none"> ○ Wadasheekaysi: www.oregonyouthline.org ○ Musiibo iyo layn caafimo u dhexeeya dhawryo toban jirro. Naga la soo xidhiidh waxkasta oo diiqad ku gelinaya; aad ha u weynaado ama 	<ul style="list-style-type: none"> ● <u>Laynka Qiimaha Jaban ee Kahortagga Isdilka ee Qaran</u> 1.800.273.8255 (TALK), www.suicidepreventionlifeline.org ● <u>Laynka Qiimaha Jaban ee Trevor</u> 1.866.488.7386, www.thetrevorproject.org <ul style="list-style-type: none"> ○ Lataliyeyaal tababaran ayaa u diyaarsan inay ku taageeraan 24/7. Haddii aad tahay qof dhalinyar ah oo musiibo ku jira, aad dareemayso baahi isdil, ama aad u baahan tahay goob aad ku hadasho oo ammaan ah oo aan xukun lahayn. ● <u>Xarunta Caafimaad ee Ballan-la'aanta ah ee Degdegga ah</u> (503) 963-2575 <ul style="list-style-type: none"> ○ Xarunta caafimaad waxa ay caawin kartaa qof kasta oo wajahaya mushkilad caafimaad maskaxeed ah iyada oo aanay wax kharash ah ku dallaceyn. ○ Raadso daryeel degdeg ah inta aad ku gudo jirto mushkilad caafimaadka maskaxeed ah ○ La hadal dhakhtar maskaxeed ama khabiir kalkaalin caafimaad maskaxeed
--	--

<p>aad ha u yaraadee! Dhawryo toban jirradu waxa ay diyaar u yihiin caawimo maalinkasta laga bilaabo 4-10 gd Wakhtiga Baasifigga (wicitaanada ka baxsan saacadaha la sheegay waxa lagaga jawaabayaa Lines for Life)</p>	<ul style="list-style-type: none"> o Caawimo ka hel daawooyinka iyo daaweynta o Goobta: 4212 SE Division St, Portland o Saacadaha: Isniinta -Sabtida: 7 gh-10:30 gd, Axadda 9 gh- 9 gd
---	---

Si aad uga hesho macluumaad dheeraad ah, oo ku saabsan midkasta oo kamid ah taageerooyinkan fadlan ka eeg <https://www.pps.net/domain/44>

CINWAANKA IX

Wax Ka Beddelitaanada Waxbarasheed ee 1972 waa sharci xuquuqda madaniga oo federaal ah kaas oo mamnuuca takoorka iyo dhibaataynta ku salaysan jinsiga dhammaan barnaamijyada iyo hawlaha waxbarasheed. Cinwaanka IX waxa uu siyaasadda gobolka iyo degmada kala shaqeeyaa xaqiijinta in ardaydu si ammaan ah galaangal ugu helaan waxbarashadooda. Cinwaanka IX waxa uu mamnuuca waxyaabaha soo socda:

dhibaataynta galmeed, xadgudubka galmeed, dabagalka, xadgudubka sheekada jaceyl ee guryeed/dhawryo toban jirrada, iyo/ama takoorka ama dhibaataynta ku salaysan jihada galmeed ama aqoonsiga jinsiyeed: takoorka ku salaysan uurka ama xaaladda waalidnimo iyo/ama takoor ka dhaca barnaamij isboorti ama waxbarasheed oo PPS oo kasta.

Kahor bilawga sanad dugsiyeedka, maamulaha ama agaasimaha barnaamijka ayaa magacaaba [Isuduwe TIX Dugsiyeed](#) kaas oo tababar iyo taageero gaar ah ka heli doona xafiiska degmada PPS kana masuul ah xaqiijinta u hoggaansanka Cinwaanka IX ee dugsiyiisa ama barnaamijkiisa. Liiska Isuduwayaasha waxa la daabacaa Ogosto kasta waxana laga heli karaa [websaytka qoyska Cinwaanka IX](#).

Si aad u soo gudbiso walaac Cinwaanka IX ah, fadlan booqo www.pps.net/titleix si aad uga hesho liis ah xuquuqda iyo ikhtiyaarrada.

Wixii ah faahfaahinta Cinwaanka IX, baadhitaanada, ikhtiyaarada anshax-marineed iyo tallaabooyinka taageerada ee la heli karo, fadlan ka tixraac [Siyaasadda Lidka Dhibaataynta iyo Xadgudubka Sheekada Jaceyl ee Ardayga](#) iyo tilmaamaha maamul ee soo socda: [Ardayda ah Jinsi-beddelka, Jinsi-laawaha iyo Jinsiga Gaarka ah ee 4.30.061-AD, Habraacyada iyo Kahortagga Dhibaataynta, Xadgudubka Galmeed, iyo Xadgudubka Sheekada Jaceyl ee Dhawryo Toban Jirrada ee 4.30.071-AD, Ardayda, Takoorka iyo Dhibaataynta Jinsiga ku Salaysan ee Ardayda ka Dhex Dhaca](#)

AAGAGGA IYO HAWLAHA KU XIDHAN DUGSIGA

XAADIRITAANKA

Ardayda waxa laga filayaa inay dugsiga iyo fasallada usoo xaadiraan si joogto ah iyo wakhtiga munaasabka ah. Waalidiinta/daryeelayaasha ayaa sharci ahaan masuul ka ah inay carruurtooda dugsiga keenaan. Waalidka/daryeelaha waxa in uu ogaysiiyo shaqaalaha dugsiga maqnaanshooyinka iyo/ama habsannada isaga oo u diraya qoraal, iimeyl, faakis, ama isaga oo u dhaafaya voicemail ama farriin. Maqnaanshiyooyinka soo socda waa loo cudurdaarayaa marka waalidka/daryeeluhu usoo sheego shaqaalaha dugsiga:

- xanuun arday
- xanuun qoys oo u baahan joogitaanka ardayga
- ciido diimeed
- geeri ku timid qoyska
- ballamo dhakhtar caafimaad ama dhakhtar ilkeed oo hore loo sii qabtay.

Ogaysiisku waa in uu dhacaa saddex (3) maalmood oo maqnaanshaha ka bilaabma gudahood waana inay ku jiraan:

- taariikhda
- magaca ardayga
- sababta maqnaanshiyaha iyo
- saxeexa waalidka/daryeelaha

Ardaydu waa inay soo buuxiyaan dhammaan shaqada uu ka maqnaa waxana uu ku heli doonaa saacado waxbarasheed shaqada buuxinta ee maqnaanshiyooyinka loo cudurdaaray. Sharciga gobolku waxa uu ku waajibiyaa dugsiyada inay dib u celiyaan ardayda maqnaada toban (10) maalin dugsiiyeed oo isku xiga sabab kasta oo keenta.

Marka waalidiintu/daryeelayaashu u baahdaan inay qaadaan ilmahooga kahor wakhtiga rawaxaadda ee caadiga ah, waa inay yimaadaan xafiiska dugsiga. Xafiisku arday uma fasixi karo qof aan ku jirin foomka macluumaadka xaaladda degdegga ah ee ardayga. Haddii waalidiintu/daryeelayaashu qof kale u soo diraan in uu soo qaado arday, qabanqaabino qoraal ah oo hore waa in lagu sameeyo xafiiska.

PARENTVUE: waa database ka dabagalka nidaamka ee xaadiritaanka Waalidiinta, dhawaqa magaca, xaadiritaanka dugsiga, dhibcaha, jadwallada, iyo macluumaadka dugsiga ee kale Si aad u hesho taageero ku aaddan PARENTVUE, booqo <https://www.pps.net/Page/2341>

ISKU XIGXIGITAANKA ANSHAX-MARINTA

Goobta iyo goorta anshax-marintu habboon tahay: ardaydu gudbino anshax-marineed baa ay kala kulmi karaan dhacdooyinka ka dhaca hantida degmada wakhti kasta iyo kuwa ka dhaca munaasabad dugsiiyeed, sida socdaal bannaanka ah ama qoob-ka-ciyaar goobta ka baxsan. Ardaydu waxa ay kala kulmi karaan cawaaqib habdhaqanka inta ay kusii socdaan ama kasoo socdaan dugsiga muddo wakhti ah oo macquul ah gudihi.

- Ardaydu waxa ay kala kulmi karaan tallaabo anshax-marineed habdhaqannada dhaca inta ay

u socdaalayaan ama kasoo socdaalayaan dugsiga. "Isku Xigxigitaanka Anshax-marinta" waxa uu munaasab yahay marka ardaygu kasoo socdaalayo guriga ee uu dugsiga u socdaalayo iyo marka uu dugsiga kasoo socdaalayo ee uu dib guriga ugu soo noqonayo.

- Ardayda waxa loo anshax-marin karaa habdhaqan kasta oo goobta ka baxsan ama onlayn ah kaas oo "soo gaadha" dugsiga oo ku keena carqaladeyn weyn deegaanka waxbarashada.

Filashooyinka habdhaqanka degmadu waxa uu munaasab ku yahay ardayda markasta oo ay:

- Joogaan dugsi ama hantida degmo dugsiyeedka;
- Ku sugan yihiin hawl dugsigu kafaalo qaaday, iyada oo aan la tixgelineyn goobtiisa, oo ay kamid tahay u socdaalista iyo kasoo socdaalista muddo wakhti ah oo macquul ah gudihii;
- U socdaalayaan kana soo socdaalayaan dugsiga sida lagu qeexay dokumentigan ku jira qaybta "Kahor iyo Kadib Dugsiga";
- Ku lug leeyihiin adaabta (iyada oo aan la tixgelineyn inay ka maqan yihiin ama aanay ka maqneyn xarunta ama ay ku sugan yihiin barnaamij aanu dugsigu kafaalo qaadin) kaas oo xidhiidh toos ah la leh ammaanka iyo/ama badqabka dugsiga.

HABDHAQANKA BULSHADA DHEXDEEDA: marka ay u lugaynayaan ama kasoo lugaynayaan dugsiga, ama ay sugayaan bas, ardayda waxa laga filayaa inay ixtiraamaan xuquuqda iyo hantida dadka kale.

HAWLAHA KA BAXSAN MANHAJKA: Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa ay aaminsan tahay in Hawlaha Manhajka Ka Baxsan ee ardaydu ay yihiin qayb aasaasi ah oo kamid ah barnaamijka waxbarasheed ee nidaamka dugsiyeed ee Portland.

NAADIYADA: naadi waa koox arday ah oo kulma wakhti joogto ah, wadaaga wax ay xiiseeyaan oo ka dhexeeya, ama doonaya inay bixiyaan adeeg. Naadiga waa in uu kormeeraa qof weyn oo uu soo ansixiyey maamuluhu waana inay u furnaadaan arday walba.

- Gaadiidka ardayda ka qaybqaadanaya naadi kulma kahor ama kadib dugsiga waa masuuliyadda waalidka/daryeelaha.
- Ardayda waxa lagu dhiirrigelinayaa inay ka qaybqaataan hawlaha iyo adeegyada dugsiga ee dardargeliya jawi togan oo dugsiga gudihisa ah. Sidoo kale waxa loo ogol yahay inay mashaakilka dugsiga kala doodaan macallimiinta iyo maamulaha oo ay ka qaybqaataan go'aan gaadhista iyo xallinta mashaakilka.

ISBOORTIGA DUGSIGA-KADIB EE AAN PPS AHAYN: qaar ah nashaadaad naadiyo isboorti ayaa ah kuwo aanay ayidin ama aanay kafaalo qaadin Dugsiyada Dadweynaha Portland. Ka qaybqaadashada naadi isboorti oo kasta oo dhaca wakhti ka baxsan maalin dugsiyeedka ama ka dhaca meel ka baxsan dhismayaasha dugsiga masuuliyaddeeda oo dhan waxa iska leh ardayga iyo waalidka/daryeelaha.

TARTANKA DUGSIYADA KA DHEXEYYA EE PORTLAND(PIL): ciyaaraha isboortiyeed waxa ay adeegsadaan khibrado waxbarasheed oo dabiici ah si ay ugu dardargeliyaan casharo inta la nool yahayba wax anfacaya sida wadashaqaynta kooxeed iyo is-xakameynta isla mar ahaantaas oo aanu u fudeydinayno horumarinta jidheed iyo shucuureed ardaydayada isboortiyahanada ah.

- Ciyaaraha Isboortiyeed ee Dugsiyada Sare 9-12: waxa loogu talagalay in lagu dardargeliyo ka

qaybqaadashada iyo dhaqan-wanaagga isboortiyeed iyada oo loo marayo barnaamij ciyaaro isboorti oo dugsiyada ka dhexeeya oo tartan ah. Isboortiyahan kasta waxa la siiyaa fursado, aqoonsi togan, iyo khibrado waxbarasho oo taageera isla markaana ballaadhiya yoolasha akaadeemiyadeed ee Dugsigeena Sare.

- Dugsiga Dhexe 6aad - 8aad: barnaamijka isboortiga dhallinyarta waxa maamuli doona (PIL). Isboortiyahanada-ardayda ah waxa ay meteli doonaan kooxda dugsiyada sare ee xaafadaha. Kooxda isboortiyahan kasta uu ka qaybqaadanayo waxa lagu go'aamiyaa cinwaana.

BASASKA DUGSIYADA: gaadiidka baska dugsiyada waa faa'iido ay ardaydu ku sii haystaan inay noqdaan kuwo ammaan ah, ixitiraam badan, oo masuul ah:

- Haddii arday bas dugsiyeed u sii raaco kana soo raaco dugsiyada, waa inay raacaan xeerarka baska ee lasoo dhejiyey. Masuul dugsiyada ka tirsan ayaa ardayda iyo darawallada basaska kala shaqayn doona habdhaqanada baska dushiisa iyo goobaha lagu sugo basaska.
- Arday waxa uu ku waayi karaa faa'iidada bas-raacista habdhaqan xun oo joogto ah ama jebin halis ah oo uu kula kaco sharci bas.
- Gobolka Oregon waxa uu leeyahay sharciyo loogu talagalay ardayda raacda basaska dugsiyada. Sharciyadan waxa lagu dhejiyey dhammaan basaska dugsiyada.

TIKNOOLAJIYADDA: ardaydu waxa ay galaangal u heli karaan aaladaha dijitaalka ah, softiweer, iyo internet ka inta ay ku sugan yihiin dugsiyada. Waxa jirta waxoogaa halis ah oo la socota dhaqdhaqaaqa onlaynka ah.

HABSAMI ADEEGSIGA DIJITAALKA: Muwaadinimada Dijitaalka iyo adeegsiga onlaynka ee habboon waa kuwo muhiim ah inta lagu gudo jiro iyo inta aan lagu gudo jirin maalin dugsiyeedka. Galaangal helitaanku waa faa'iido, oo ardaydu waa inay raacaan shuruucda iyo siyaasadaha lagaga hadlay Siyaasadda Adeegsiga La Aqbali Karo ee PPS. In la raaci waayo shuruucda iyo siyaasadaha Adeegsiga-khaldan waxa uu keeni karaa waayitaanka faa'iidada adeegsiga aaladaha ama galaangal u helidda internet ka waxana ay keeni kartaa waayitaanka galaangal helitaanka, tallaabo anshax-marineed ama sharciyeed. PPS waxa ay ka filaysaa dhammaan ardayda inay noqdaan adeegsadeyaal dijitaal oo:

Aan:

- la wadaagin cidkale macluumaad ku saabsan naftooda ama dadka kale.
- dhib ku keenin dadka kale ama waxyeelaynin hantidooda.
- Dhib ku keenin arday kale ama dugsi ama bulshada
- Waxyeelin qalab kombuyuutar, xog, ama faylal.
- Dabagelin jabsasho.
- Nuqul ka sameyn ama soo dejisan agab xuquuq baahineed leh.
- Eegin, dirin, nuqul ka sameyn, ama abuurin wax handadaad ah, edab darro ah, aan munaasab ahayn, ama looga gol leeyahay in lagu waxyeelleeyo shucuurta, sharafta, amafursadaha qof.
- Ogolaansho ama xigasho la'aan ku adeegsan ama xadin macluumaad, muusig, muuqaallo, ama farshaxanada dijitaaleed ee ka ilaashan-nuqulka ee kale.
- libsan, iibin ama xayeynsiin alaab iyada oo qayb ka ah mashruuc dugsiyeed oo la ansixiyey mooyee.
- Ku soo dejin ablikeeshino kombuyuutarrada iyada oo uu ansixiyo macallin ama shaqaale Degmeed mooyee.

Fahansan:

- Keliya ardayda kuwaas oo imika ahaan diiwaangashan inay adeegsan karaan shabakadda

Degmada. Faa'iidadaada adeegsiga tiknoolajiyadda in uu kaa qaadi karo shaqaale ama waalidiintu haddii aad ku lug yeelato habdhaqan aan munaasab ahayn.

- Ikhtiyaarrada aad samaynayso inta aad adeegsanayso kombuyuutar ama internet ka. U sheeg qof weyn haddii aad aragto wax handadaad ah ama aan munaasab ahayn oo dhacaya.
- Waxa aad onlayn ku samaynaysaa in aanu gaar kuu ahayn.

Sameeya inay:

- Qiraan in Degmadu bixiso khibrad onlayn oo ammaan ah illaa inta shuruucda la raacayo.
- Galaangal u helaan oo adeegsadaan agabka iskaashiyeed, baraha, geemamka, iyo raadinta ammaanka ah.
- Noqdaan kuwo ixtiraam badan, masuul ah, oo ammaan ah inta ay adeegsanayaan aaladaha.
- Ku xidhiidhaan onlaynka qaabab ay ku dheehan tahay dhibirsanaan iyo ixtiraam.
- Adeegsadaan keliya akownkooga oo aanay adeegsan dadka kale kuwooga, oo ay qarsadaan macluumaadka akownkooda iyo baasweedhkooda.
- Eegaan oo adeegsadaan shabakadaha uu ogolaaday macallinku ama shaqaalaha Degmadu.

ADEEGSIGA TALEEFANKA: wixii ah siyaasadaha adeegsiga taleefanka, fadlan ka tixraac Buugyaraha Cimilada Dugsigaaga, kaas oo ku jira websaytka dugsigaaga.

BARAHA BULSHADA: xaaladaha qaar, ardaydu waxa dhici karta in aanay la kulmin anshax-marin ku aaddan waxyaabaha ay baraha bulshada soo dhigaan ee ka baxsan Isku Xigxigitaanada Anshax-marinta. Waxa jira ka reebitaano dhawr ah:

- Marka wax lasoo dhigay iyada oo la joogo xarunta ama goob ah munaasabad dugsiyeed.
- Marka waxa lasoo dhigay uu yahay dhibaatayn, handadaad, ama gardarreysi isla markaana ku keenaan carqaladeyn laxaad leh deegaanka waxbarasho iyo/ama bulshada dugsiga.
- Marka wax loo soo dhigo si loogu qorsheeyo habdhaqan rabshad leh ama sharci darro ah oo ka dhaca dugsiga. Tusaalayaasha waxa kamid ah waxyaabaha la soo dhigo ee ah dhibaataynta, handadaadda, ama gardarreysiga, kuwa qorshaynaya inay qabanqaabiyaan dagaal, ama ogaysiisyada ku saabsan qorshaynta keenista walxo mamnuuc ah dugsiga si looga iibiyo ama loola wadaago ardayda.
- Soo dhigitaanka dagaalada ama dhacdooyinka kale kuwaas oo khalkhaliya oo/ama ku keena carqaladeyn deegaanka waxbarashada ama bulshada dugsiga.

FILASHOOYINKA DIRAYSKA IYO LEBISKA: masuuliyadda dirayska iyo lebbiska ardaygu waxa uu ugu horreyn saaran yahay ardayga iyo waalidiintiisa ama daryeelayaashiisa.

Lebiska & Dirayska La Ogolaan Karo

- Ardaydu waa inay xidhaan dhar ay ku jiraan shaadh wata surwaal, shoorti, ama haaf, ama wax u dhigma iyo kabo.
- Dharku waa inay dun ku leeyihiin halka hore iyo dhinacyada.
- Dharku waa inay qariyaan garamada hoose, suumanka dhexdu kuma jiraan.
- Dun qarinqaysa dhammaan xubnaha hoose (oo ay kamid yihiin badhyuhu) oo waa inaanu khafiif ahayn.
- Koofiyadaha iyo madaxgashiyada kale waa inaanay qarinqaysa oo aanay xannibin aragga arday ama shaqaale kasta. Funaanadaha koofiyadda leh waa inay ogolaadaan wejiga iyo dhegaha ardayda inay arkaan shaqaaluhu.
- Dharka iyo kabuhu waa inay munaasab ku yihiin nashaadaadka fasalka ee jadwalaysan, oo ay kamid yihiin waxbarashada jimicsiyeed, laababka sayniseed, faaradlaha, iyo hawlaha kale ee halisaha gaarka ahi ka jiraan.

- Koorsooyin gaar ah ayaa u baahan kara dirays gaar ah, sida diraysyada isboortiga ama qalabka xidhashada ee ammaanka.

Lebiska & Dirayska Aan La Ogoleyn

- Dharku waa inaanay sawirin, xayeysiin ama u doodin adeegsiga khamriga, tubaakada, marijuana, ama maandooriyayaasha kale.
- Dharku waa inaanay sawirin muuqaallo galmeed, ficillo qaawani ah ama galmeed.
- Dharku waa inaanay adeegsan ama aanay sawirin hadallo naceyb ah oo lagu bartilmaameedsanayo kooxo iyada oo lagu salaynayo qowmiyadda, isirka, jinsiga, jihada galmeed, aqoonsiga galmeed, ka mid ahaanshaha diimeed, ama kooxo la ilaaliyey oo kale.
- Dharka, oo ay ka mid yihiin is afgarashada gaangistarradu, waa inaanay handadin caafimaadka ama ammaanka arday ama shaqaale kale.
- Dharku waa inaanay soo bandhigin afxumo.
- Haddii lebbiska ardaygu handado caafimaadka ama ammaanka qof kale, markaa anshax-marinta ku aaddan xadgudubyada lebiska ama diraysku waa inay waafaqsanaadaan siyaasadaha anshax-marinta ku aaddan xadgudubyada la midka ah.

HABRAACYADA ANSHAX-MARINTA

BAADHISAHA HANTIDA

HUBINADA KHAANADAHA IYO BAADHITAANADA HANTIDA ARDAYDA: dugsigu waxa uu baadhi karaa arday haddii dugsigu si macquul ah uga shakiyo in walax mamnuuc ah ama khatar ah laga heli doono. Shandadaha dhabarka, khaanadaha, iyo aagagga wax dhigashada la qoondeeyey ayaa sidoo kale la baadhi karaa. Khaanadaha, miisaska, iyo goobaha kale ee ardaydu ay dhigtaan alaabta waa hanti ay leedahay oo uu maamulo dugsigu waxana laga hubin karaa wakhti kasta agabyo khatar ah ama mamnuuc ah. Keliya agabyada ardaygu ugu baahan yahay shaqo dugsiiyeed ama hawlo dugsiiyeed ayaa lagu keydin karaa goobahan.

BAADHISTA TIKNOOLAJIYADDA: madaxda dugsigu waxa ay baadhi karaan softiweer tiknoolayadeed oo waxbarasho oo ay leedahay Degmadu iyo diiwaanada internetka wakhti kasta. sabab kasta ayaa ay u baadhi karaan iyaga oo aan ogolaansho ka qaadaneyn ama ogaysiineyn ardayga ama waalidka. Taleefannada gacannada ardayda, taleefanada casriga ah, tableddada iyo kombuyuutarrada shakhsi ahaan loo leeyahay, iyo qalabka lamidka ah ee kale waxa loo tixgeliyaa inay yihiin hanti shakhsiiyeed. Agabyadan waxa la baadhi karaa keliya haddii uu jiro shaki macquul ah oo laga qabo xadgudub sharciyeed, siyaasad degmeed, ama shuruuc dugsiiyeed iyo shaki macquul ah oo laga qabo in caddeyn faldembiyeed ay ku jirto qalabka.

ANSHAX-MARINTA

Shaqaalaha dugsiga iyo waalidiinta/daryeelayaasha ayaa masuul ka ah inay dhiirrigeliyaan habdhaqanka habboon ee ardayda.

- Shaqaalaha dugsiga waxa laga filayaa inay adeegsadaan silsilad xidhiidh ah oo ah wax ka qabashooyin, xeelado, iyo taageerooyin habdhaqan togan oo ay ku barayaan, ku dhiirrigelinayaan oo ku xoojinayaan habdhaqanada habboon ee qayb ka noqda deegaan waxbarasho.
- Shaqaalaha dugsiga waxa laga filayaa inay wax ka qabtaan xilli hore oo ay ku bilaabaan hannaanka anshax-marineed heerka macquulka ah ee ugu hooseeya ee si macquul ah loo xisaabiyey si wax looga beddelo habdhaqanka ardayga isla markaana loo yareeyo wakhti daayaca waxdhigista. Taas marka laga yimaaddo, shaqaalaha Degmadu waa inay tixgeliyaan dhammaan beddellada la heli karo, iyaga oo ugu horreyn diiradda saaraya khayraadka qoyska iyo dugsiga marka ay barayaan filashooyinka dugsiga oo ka jawaab celinayaan dhaqan xumada. Shaqaalaha Degmada ee baadhaya dhaqan xumada ardayga ma sameyn doono takoor ka dhan ah ardayda oo ku salaysan qowmiyadda, midabka, qaranka uu qofku kasoo jeedo, jinsiga, diinta, naafanimada, jihada galmeed, aqoonsiga jinsiyeed, ama kooxo la ilaaliyey oo kale sida ku qeexan Siyaasadda Lidka-Takoorka 1.80.020-P

Kahor ka reebista, shaqaalaha dugsiga waa inay tixgeliyaan:

- Nooca dhaqan xumada.
- Da'da, caafimaadka, naafanimada, iyo/ama xaaladda waxbarashada gaarka ah ee ardayga.
- Qodobbada dhaqan ama luuqadeed ayaa sidoo kale door ku yeelan kara dhaqan xumada.
- Habboonaanta meelaynta akaadeemiyadeed ee ardayga.
- Dhaqanka hore ee ardayga iyo diiwaanka habdhaqanka.
- Nidaamyada taageero ayaa diyaar u ah ardayga.
- U diyaarsanaanta ardayga ee in uu saxo waxyeellada.
- Saameynta dhacdadu ku leedahayguud ahaan bulshada dugsiga.
- Helitaanka barnaamijyo ka hortag iyo wax ka qabasho oo loogu talagalay wax ka qabashada dhaqan xumada ardayda.
- In ardaygu si ikhtiyaari ah u soo sheegay dhaqan xumada.
- Marka hakin dugsiga-ka-baxsan lasoo rogo, dugsigu waa in uu qaado tallaabooyin uu kaga hortagayo soo noqnoqshada habdhaqanka keenay hakinta dugsiga-ka-baxsan iyo kusoo noqoshada ardayga ee goobta fasalka si loo yareeyo joogsiga ku imanaya waxdhigista akaadeemiyadeed ee ardayga.
- Si waafaqsan 4.30.011-AD, Habraacyada Anshax-marinta Ardayga:

Adeegsiga eryiddu waxa uu u xaddidan yahay:

- Dhaqanka handadaad ku haya caafimaadka iyo ammaanka ardayda ama shaqaalaha dugsiga; ama
- Marka xeeladaha kale ee loogu talagalay wax ka beddelka habdhaqanka ardaygu ay waxtar yeelan waayeen; ama, ama,
- Wixii waafaqsan siyaasadaha iyo sharciyada degmada iyo sharciga Gobolka.

Ardayga ku jira **fasalka shanaad ama wixii ka hooseeya**, adeegsiga hakinta ka-baxsan-dugsiga ama eryiddu waa ay xaddidan tahay. Tallaabo anshax-marined oo ka kooban ka eryid dugsi arday ku jira fasalka shanaad ama ka hooseeya waa in uu u hoggaansamaa sharciga Gobolka Oregon iyo Siyaasadda ORS 339.250 iyo Siyaasadda Degmada.

SHAXDA HABDHAQANKA

NOOCA I

(Habdhaqannada ay Dib u Jiheeyeen Shaqaaluhu, gubdinta Marxaladda 1 ee TeacherVue)

<p>HABDHAQANKA A/ XADGUDUBKA</p>	<p>Wixii ah Habdhaqannada NOOCA I, u adeegso Database ka Heerka I ee MTSS ka hagitaan ahaan.</p> <ul style="list-style-type: none"> ● Diiqadeynta, mashquulinta ardayda kale ● Raacid la'aanta tilmaamaha (dhammaan fasallada) ● Hoggaansan-la'aanta Madax-adeyga, Amar-diiddada Kaska ah ee Fudud, Qaadasho la'aan tilmaan ama amar habboon oo la ogolaaday oo ay bixiso xubin shaqaale ahi. ● Ka Baxsan Xuduudaha Gelitaanka goob ah dhisme ama hanti dugsiyeed laga xannibay adeegsiga ardayda ama gelitaanka goob laga xannibay adeegsiga ardayga inta lagu gudo jiro wakhtiyo gaar ah oo maalinta ah. ● Bixitaanka ogolaansho la'aan Soo xaadiri waaga fasal la qoondeeyey ogolaansho ama cudur daar la'aan; ka bixitaanka dhismaha, fasalka, ama aagga la qoondeeyey iyada oo aan laga helin ansixin hore macallinka iyo/ama masuul. ● Habsanka Joogitaan la'aanta goob waxdhigis wakhtiga loo qoondeeyey. ● Adeegsiga luuqad dembi ah, eex ah, oo/ama edabdarro ah taas oo lagu saxo wax ka qabasho ama dib u jiheyn 	
<p>JAWAABAHA SUURAGALK A AH</p>	<ul style="list-style-type: none"> ● Wadasheekaysiga Dib-u-hagaajineed ● Ku celceli tilmaamaha/Dib-u-bar Xeerka ● U tababar si deggan (la soco adiga oo ammaanaya haddii ardaygu raaco tilmaamaha) ● Xusuusin ah filashooyinka/heshiisyada fasalka ● Ha fogaan ● Bareega ku qaado fasalka dhexdiisa marka ay macquul tahay ● Bareeg/nususaace nidaamsan <p>XAADIRI WAA FASAL</p> <ul style="list-style-type: none"> ● Maqan ku calaamadi ardayga ● Shirka Ardayga - fahan sababaha habdhaqanka oo deji yoolal aad ku horumarinayso habdhaqanka 	<ul style="list-style-type: none"> ● Wareeji kursiga ardayga ● Dib u jihee/tababar si deggan ● Xaalad-dejin (Caawi oo Dhegayso, Si Habboon Tilmaamo U Bixi, Ka Aamus "Help, Prompt, Wait") ● Waraaqda dhaqan-xumada ardayga ● Ka sheekaynta habdhaqanka ardayga ee kadib filashada dhaw ● Waayitaanka faa'iido ● La xidhiidh Waalidka/Daryeelaha ● 5:1 Falgallada togan oo ku aaddan falgallada toosineed <p>KA BIXITAANKA GOOBTA OGOLAANSHO LA'AAN</p> <ul style="list-style-type: none"> ● Haddii ardaygu ku sugan yahay meel laga arki karo, ku dhiirrigeli ardaygu in uu soo noqdo ● Haddii ardaygu aanu ku sugneyn meel laga arki karo, waxa aad wacdaa caawimo si aad uga dalbato qof in uu raadiyo ardayga

HAKIN	Maya
DHEGAYSI	Maya

NOOCA II (Masuul ama wakiilkiisa ayaa geliya dhacdo marxaladda 2 / 3 ah isgarabsi)	
HABDHAQAN KA/ XADGUDUBK A	<ul style="list-style-type: none"> ● Dabadheer (joogto ah) Xadgudub nooca I ah oo aan ku xallismis wax ka qabashadii hore ● Adeegsi Xumada Kaska ah ee Hantida Adeegsiga kaska ah ee aan loo haysan ogolaansho habboon ee hantida uu leeyahay dugsigu ama shakhsi isla markaana ujeedka adeegsiga uu yahay mid aan ahayn waxa loogu talagalay ama loo adeegsaday qaab ay u badan tahay in uu waxyeelleeyo hantida. ● Habdhaqanka Rabshadda Leh U dhaqanka qaab rabshadeeya ama carqaladeeya hannaanka waxbarasheed, oo uu kamid yahay fal galmeed la isla ogol yahay. ● Ka Jawaabidda Hore ee Luuqadda ah Dembiga iyo/ama Xadgudubka Qorista ama odhaanshaha waxkasta oo ku dheeldheelaya ama bahdilaya qof kale iyada oo sababtu ay tahay da', midab, caqiido, naafanimo, xaalad guur, qaranka uu qofku kasoo jeedo, qowmiyad, diin, jinsi, aqoonsi jinsiyeed, ama jiho galmeed, kuwaas oo ah kuwo hadal ah, kuwo jidheed, kuwo aan hadal ahayn ama kuwo dijitaal ah (oo ay ku jiraan kuwo onlayn ah) kuwaas oo jirana xattaa kadib wax ka qabashooyinka bilawga ah marka la dabbaqo oo/ama ay noqonayaan kuwo baahsan. ● Ka Jawaabidda Hore ee Dhibaataaynta iyo Gardarreysiga Habdhaqanka cabsigelinta ama xadgudubka ah ee ku wajahan arday, shaqaale, ama bulshada dugsiga taas oo ku salaysan balse aan ku xaddidneyn: naafanimo, qowmiyad, midab, naafanimo, ama qaranka uu qofku kasoo jeedo, jihada galmeed ama aqoonsiga ama cabiraadda jinsiyeed, diinta, ama koox la ilaaliyey oo kale, kuwaas oo ah kuwo hadal ah, kuwo jidheed, kuwo aan hadal ahayn ama kuwo dijitaal ah (oo ay ku jiraan kuwo onlayn ah) kuwaas oo jirana xattaa kadib wax ka qabashooyinka bilawga ah marka la dabbaqo. ● Foojariga Bixinta saxeex been abuur ah ama wax ka beddelidda dukumintiyada dugsiga. ● Taabashada Jidheed ee aan Habbooneyn Riixitaanka, Tukhaantukhinta, Faro-ka-ciyaarka, ama taabasho kale oo aan munaasab ahayn oo aan keenin waxyeello. ● Xadgudubka Tiknoolajiyadeed ee Fudud u adeegsiga qalab tiknoolajiyadeed qaab aan ka ahayn qaabka uu tilmaamay shaqaalaha dugsigu; oo ay kamid tahay balse aan ku xaddidneyn ku xadgudubitaanada siyaasadda adeegsiga taleefanka, siyaasadda adeegsiga kombuyuutarka ama ammaanka internet ka ● Xigasho La'aan Qaadashada/Khiyaanada In uu qof soo bandhigo shaqo qof kale isaga oo sheeganaya in uu isagu leeyahay. ● Haysashada Agab Mamnuuc ah Haysashada agab aan loo ogoleyn

	<p>dugsiga. Waxa kamid ah hubka aan dhabta ahayn ee loo eekaysiiyey hub dhab ah. Mindiyaha waxa loo tixgeliyaa inay yihiin keliya walxo mamnuuc ah, iyada oo loo adeegsado mooyee qaab handadaad leh, halis ah, ama dhagar keeni karta. (Sida hubka dhabta ah oo kale, anshax-marinta ku aaddan hubka aan dhabta ahayn waa in la sameeyo iyada oo laga la tashanayo Isuduwaha Habdhaqanka Ardayda)</p> <ul style="list-style-type: none"> ● Xatooyada Qaadashada hanti uu leeyahay dugsigu ama shakhsi kale ama koox iyada oo aan laga haysan ogolaansho hore. Xatooyada Fudud: waxa kamid ah agabyada leh qiimaha tafaariiqda ee kayar (\$20) balse aanay ku jirin agabyada shakhsiyeed sida shandadaha lacagta, boorsooyinka, ama furayaasha. ● Gelitaanka ogolaansho la'aanta ah Gelitaanka hanti dugsiyeed ama xarumo dugsiyeed iyada oo aan awood munaasab ah loo lahayn; inta lagu gudo jiro saacadaha dugsiga; oo ay kamid yihiin gelitaan kasta oo dugsiyeed inta lagu gudo jiro muddada hakinta ama eryidda
--	---

<p>JAWAABAHA SUURAGALK A AH</p>	<p>Waxa dheeraad ka ah NOOCA I, Jawaabaha</p> <ul style="list-style-type: none"> ● Hubi xogta nooca I ● Shir Hagaajineed ama Dhaqan Hagaajineed oo kale ● Gal Kabax "Check in Check Out (CICO)" ama Hubi oo Ku Xidho "Check and Connect" ● Bareegyadu waa Wanaagsan Yihiin "Breaks are Better (BrB)" ● Shaqo Macno Leh "Meaningful Work" ● Taageerooyin Shucuureed ● Shirka Waalidka/Daryeelaha ● Heshiiska Fogaanshaha ● Wax ka qabashada iyo joojinta habdhaqanka ● Kala soocidda ardayda ● U qoritaanka waraaq qofka waxyeellada geystay ● Waayitaanka faa'iido ● Qorshaha Ammaanka ● Dhismaha Xirfadaha Kooxda Yar ee lala kaashado Xubnaha Kooxda Taageerada 	<ul style="list-style-type: none"> ● Shirka Ardayga fahan sababaha habdhaqanka oo deji yoolal aad ku horumarinayso habdhaqanka ● Kooxda Taageerada Ardayda ee Kooxeed/Shakhsiyeed ee Wax Ka Qabashada Ardayga ● Wixii ah dhibaataaynta jinsiga ku saleysan, ogaysii Isuduwaha Cinwaanka IX (ee dugsiga) ● Heshiiska Fogaanshaha ama Xidhiidh La'aanta ● Baadhista Cinwaanka IX ee suuragalka ka ah heerkano ● Agabka heerka 2 ee Cinwaanka IX lagu carqaladeynayo, wax lagu barayo lagagana hortagayo soo noqnoqoshada iyada oo isla markaas lagu taageerayo ardayga(da) dhibka geystay (taageero waxbarasheed iyo kulanno joojin waxbarasheed)
---------------------------------	--	---

<p>HAKIN</p>	<p>Suuragal Hakinada ah waa inay noqdaan kuwo korniinka munaasab ku ah. Waa inay tahay arrin laga fekeray oo iskaashi la sameynaysa Isuduwaha Dhaqanka Ardayga iyo shaqaalaha Degmada ee masuulka ka ah kormeerka dugsiga. Hakintan waa in loo adeegsado in lagu abuur qorshe taageeraya ardayga una sahlaya shaqaalaha inay aqoonsadaan doorka ay ku leeyihiin habdhaqanka ardayga. Inta lagu gudo jiro hakinta, cid wakiil ka ah shaqaalaha dugsigu waa inay siisaaagab waxbarasho ardayga isla markaana la xaqiijisaa. Marka ardaygu soo noqdo, masuulku waa in uu qabtaa kulan dib u qabanqaabin ah oo uu la yeelanayo ardayga iyo waalidiinta meelkasta oo ay suuragal ku tahay. Kulanka dib u qabanqaabintu waa in uu daarnaadaa sameynta qorshe ku taageeri doona ardayga in uu gaadho guusha ugu badan ee suuragalka ah mustaqbalka. Sidoo kale waa wakhti ku habboon in laga fekerro in lagu daro ama aan lagu darin ardayga ajendaha Kooxda Wax Ka Qabashada Ardayda haddii aanu horeba ugu sii jirin.</p>
<p>DHEGAYSI</p>	<p>Suuragal kadib marka laga la tashado Isuduwaha Dhaqanka Ardayda shaqaalaha Degmada ee masuulka ka ah kormeerka dugsiga.</p>

NOOCA III

(Masuul ama wakiilkiisa ayaa geliya dhacdo marxaladda 2 / 3 ah isgarabsi)

HABDHAQAN
KA/
XADGUDUBK
A

- **Nooca II oo Dabadheeraada (joogto noqda)**
- **Budhcadnimo** Gelitaan aan la ogoleyn oo la galo dhismo Degmo Dugsiyeed iyada oo la damacsan yahay u geysashada faldembiyeed marka dhismuhu xidhan yahay ardayda iyo dadweynaha.
- **Ku Handadaad Bam** U sheegista dugsiga, bilayska, ama saraakiisha dabdemiska in bam yaallo hantida dugsiga ama meel u dhaw
- **Soo Bandhigista Agab Si Cad Xadgudub U Leh** Soo bandhigista agab si cad xadgudub ugu leh jinsi ahaan, qowmiyad ahaan, ama diin ahaan.
- **Jawaabta La Adkeeyey ee ku aaddan Dhibaatayn ama gardarreysi:** Habdhaqanka cabsigelinta ama xadgudubka leh ee ka dhanka ah shaqaale arday ama ardayga bulshada dugsiyeed ee ku salaysan balse aan ku xaddidneyn: qowmiyadda, wadanka uu kasoo jeedo qofku, midabka, jinsiga, aqoonsiga jinsiyeed, jihada galmeed, da'da, diinta, naafanimada jidheed ama maskaxeed, dhibaataynta ama gardarreysigu waxa uu noqon karaa mid hadal ah, mid jidheed, mid aan hadal ahayn ama dijitaal ah (oo uu ka mid yahay ka onlaynka ahi) kaas oo siina socon kara xattaa kadib wax ka qabashooyinka marka la dabbaqo oo/ama ay yihiin kuwo baahsan.
 - Tan waxa kamid ah balse aan ku xaddidneyn:
 - Cabsigelin, ku handadaadda dhaawac ama aargoosi haddii laga gudbiyo warbixin
 - Habdhaqan kasta oo si laxaad leh u carqaladeeya waxbarashada ardayga ama kan ka abuura deegaan colaadeed dugsiga
 - Dhaqanka ay ku jiraan sumcad-dilka hadalka ah, hadalka eexda ah, magac isku bixinta, ama habdhaqan aan hadal ahayn (sida: bayaano qoraal ah oo la qurxiyey ama cad), iska yeelyeelka falal ama dhaqdhaqaaqyo galmeed
 - Si kas ah u baahinta kutidhi-kuteeno, xan ama isku dayo loo galayo bahdilaadda arday kale
 - Codsio soo noqnoqda oo lagu dalbanayo sawiro qaawan ama baahinta sawirro, qoraallo, iyo/ama muuqaallo aan loo baahneyn, oo waadax ah
- **Jawaab La Adkeeyey oo ku aaddan Luuqadda ah Dembiga iyo/ama Xadgudubka** ee bayaanada ah qoraalka ama hadalka (oo uu ku jiro onlaynku) ee lagu damacsan yahay in lagu dheeldheelo ama lagu bahdilo arday kale, taas oo sii socota xattaa kadib wax ka qabashooyinka marka la dabbaqo oo/ama ay yihiin kuwo baahsan
- **Digniinta Dabka ee Beenta ah** Usoo sheegista dab dugsi ama saraakiisha dabdamiska ama daaritaanka digniinta dabka iyada oo aanay jirin aaminaad macquul ah oo aad ka qabto in dab jiro.
- **Dagaalanka** waxa ku lug yeesha isqabsasho jidheed oo laba geesood ah, sida riixid, tukhaantukhin, iyo wax ku dhufasho, iyada oo uu ka dhasho ama aanu ka dhalan dhaawac (sida, hirdanka laba geesoodka ah).
- **Rashta ama Walxaha Qarxa** Adeegsiga ama haysashada rash, dabridka macmalka ah, xabbado, rasaas, ama walxo ama aalado qarxa.
- **Carqaladeynta Shaqaalaha Dugsiga** Kahortagga ama isku dayga kahortagga shaqaalaha dugsigu in uu qabsado masuuliyadihiisa iyada oo loo

	<p>hanjabayo, lagu xadgudbayo, ama la dhibaataynayo.</p> <ul style="list-style-type: none"> ● Hoggaansan-la'aan Madax-adeyg, Amar-diiddo Kas ah oo Weyn, Ka jawaabi waaga tilmaan ama amar habboon oo la ogolaaday oo uu bixiyey xubin shaqaale ah oo saameyn ku leh galaagal u helitaanka waxbarashada ee dadka kale ama saameyn laxaad leh ku leh ammaanka dadka kale. ● Haysashada Hantida Luntay ama La Xaday ee Weyn Qof in uu haysto ama uu maamulo hanti la xaday markii qofka haystaa uu sabab macquul ah u haysto in uu aamino in hantida la xaday, ama haysashadu tahay mid ogolaansho la'aan uu kaga haysto hanti uu leeyahay qofkale. Waxa kamid ah agabka leh qiime tafaariiqeed oo ka badan (\$20) ama wixii ah furayaal, boorsooyin, ama shandado lacageed iyada oo aan loo eegayn qiimaha wixii ku jiray. ● Waxyeelleynta Hantida ee Weyn, Waxa ku jira xaaladaha kharashkoodu ku dallacmi doonaan Degmo Dugsiyeedka ee ah dayactirka ama beddelka waxyeellada ama waxyeellada ay ku jirto rabshid laxaad leh oo lagu la kacay nashaadaadka dugsiga, sida burburinta diiwaanada dugsiga. ● Xadgudubka Tiknoolajiyadeed ee Weyn u adeegsiga qalabka tiknoolajiyadeed qaab aan ahayn sida uu tilmaamay shaqaalaha dugsiga taas oo ku yeelata saameyn laxaad leh deegaanka waxbarashada ama bulshada dugsiga, oo ay kamid yihiin balse aanay ku xaddidneyn duubista dagaalada, waxyaabaha lasoo dhigo baraha bulshada, xadgudubyo adeegsi taleefan oo soo noqnoqda ● Dagaalka Jidheed ee Keena Waxyeellada* Si kas ah u taabashada ama wax ugu dhufashada qof kale isaga oo aan raalli ka ahayn; ama si kas ah ugu geysashada waxyeello jidheed shakhsi. ● Adeegsiga Gaadiidka ee Masuuliyad Darrada ah Adeegsiga wixii ah gaadiidka mootoorka ku shaqeeya iyo kuwa iyagu iswada isla markaana ku adeegsada dhulka dugsiga ama agtiisa una adeegsada qaab masuuliyad darro ah ama uu ku handadayo caafimaadka ama ammaanka ama uu ku carqaladaynayo hannaanka waxbarasheed. ● Handadaad keenaysa ka baqasho dhaawac* Tallaabo jidheed, hadal, qoraal, ama elegtaroonig taas oo si degdeg ah u abuurta ka baqasho dhaawac, iyada oo aan la muujin hub iyo iyada oo aan loo marsiin dhibbanaha dagaal jidheed oo dhab ah. <p>*Haddii habdahaqanka uu ku lug leeyahay shaqaale, la xidhiidh Isuduwaha Dhaqanka Ardayda iyo Madaxa Shaqaalaha Degmada ee Masuulka ka ah Kormeerka dugsiga.</p>	
<p>JAWAABAHA SUURAGALK A AH</p>	<p>Waxa dheeraad ka ah NOOCA I, II, jawaabaha</p> <ul style="list-style-type: none"> ● Masuul ayaa go'aamiya cawaaqibta isla markaana raaca baratokoolka iyo siyaasadda PPS kadibna cawaaqibta u go'aamiya macallinka iyo qoyska ● Masuulka iyo macallinka ayaa go'aamiya sida ugu wanaagsan ee dib loogu soo gelin karo kadib hakinta ● Dhaqanka Hagaajineed 	<ul style="list-style-type: none"> ● Masuulka iyo macallinka ayaa go'aamiya sida ugu wanaagsan ee dib loogu soo gelin karo kadib hakinta ● Shirka Ardayga/Waalidka fahan sababaha habdahaqanka oo deji yoolal aad ● Qiimeyna Habdahaqanka Shaqayneed/Qorshaha

	<ul style="list-style-type: none"> • Wareegga Adkeynta 	Taageerada Habdhaqan
HAKIN	Suuragal KA EEG HAKINTA KU JIRTA NOOCA II WIXII MACLUUMAAD AH EE DHEERAAD AH	
DHEGAYSI	Suuragal kadib marka laga la tashado Isuduwaha Dhaqanka Ardayda iyo Shaqaalaha Degmada ee masuulka ka ah kormeerka dugsiga.	

NOOCA IV

(Masuul ama wakiilkiisa ayaa geliya dhacdo marxaladda 2 / 3 ah isgarabsi)

HABDHAQANK
A/

XADGUDUBKA

Nooca III oo Dabadheeraada (joogto noqda)

- Tallaabo ah **Dabka-kaska ah** taas oo sababi karta dab, sida tuurista walax la shiday oo lagu tuuro qashinqub ama in si kas ah dab loo bilaabo dab ama si kas dab u qabadsiiinta hanti dugsiyeed iyada oo aan la eegayn in wax dhaawac ahi dhaco.
- **Dagaalka Jidheed ee Keena Waxyeellada ee Weyn*** Si kas ah u taabashada ama wax ugu dhufashada qof kale isaga oo aan raalli ka ahayn; ama si kas ah ugu geysashada waxyeello jidheed oo halis ah shakhsi.
- **Dhaca** Kaga qaadashada hanti qof xoog ama ku handadaadda xoog.
- **Xadgudub Galmeed (Dhibaataynta ama gardarreysiga ku salaysan galmo):** waa dhacdo dhaqan jidheed oo noociisu yahay mid galmeed oo dhaca ogolaansho la'aan ama marka ardaygu aanu u bixin karin ogolaansho sabab la xidhiidha khamri ama daroogo. Dhammaan noocyada xadgudubka galmeed, ka faa'iidaysiga galmeed, qasabka galmeed, xadgudubka galmeed, xadgudubka sheekada jaceyl ee dhawryo toban jirrada, ama ficillada ku lugta leh qasabka, cabsigelinta, handadaadda, ama xadgudub kale. Haddii dhacdo ka dhacdo dugsi ama munaasabad ama hawl uu kafaala qaaday dugsi, baadhis ay hogaamiso degmadu ayaa waajib ah. Haddii dhacdadu ka dhacday meel ka baxsan dugsiga balse ay leedahay saameynta ah inay si aan macquul ahayn inay u carqaladaynayso waxbarashada ardayga, baadhis ay degmadu hoggaaminayso ayaa *noqon kara* munaasab.
- **Dhacdo Dhibaatayn, gardarreysi, iyo/ama eex ah oo daran:** Habdhaqanka cabsigelinta ama xadgudubka leh ee ka dhanka ah arday, shaqaale, ama bulshada dugsiyeed ee ku salaysan balse aan ku xaddidneyn: qowmiyadda, wadanka uu kasoo jeedo qofku, midabka, jinsiga, aqoonsiga jinsiyeed, jihada galmeed, da'da, diinta, naafanimada jidheed ama maskaxeed, dhibaataynta ama gardarreysigu waxa uu noqon karaa mid hadal ah, mid jidheed, mid aan hadal ahayn ama diijitaal ah (oo uu ka mid yahay ka onlaynka ahi) kaas oo siina socon kara xattaa kadib wax ka qabashooyinka marka la dabbaqo oo/ama ay yihiin kuwo baahsan.

Tan waxa kamid ah balse aan ku xaddidneyn:

- Cabsigelin, ku handadaadda dhaawac ama aargoosi haddii laga gudbiyo warbixin
- Habdhaqan kasta oo si laxaad leh u carqaladeeya waxbarashada ardayga ama kan ka abuura deegaan colaadeed dugsiga
- Dhaqan ay ku jiraan afxumo hadal ah, hadal eex ah, magac-bixin,
- Dhaqan uu ku jiro habdhaqan aan hadal ahayn (sida: bayaano qoraal ah oo la qurxiyey ama waadax ah), iska yeelyeelidda falalka ama dhaqdhaqaaqyada galmeed
- Si kas ah u baahinta kutidhi-kuteeno, xan ama isku dayo loo galayo bahdilaadda arday kale
- Dalabaadka soo noqnoqda ee sawiro qaawan

- **Hub, Khatar:** Hub, aalad, qalab, shay, ama walax kasta, haddii la adeegsan

	<p>lahaa, la isku dayi lahaa in la adeegsado, ama lagu handado in la adeegsado xaaladaha markaas lagu jirey oo uu awoodna hore ugu sii lahaa sababidda dhimasho ama dhaawac jidheed oo halis ah.</p> <ul style="list-style-type: none"> ● Hub, Dilaa ah: Haysashada, adeegsiga, ama ku handadaadda adeegsiga qalab, shay ama walax kasta oo si gaar ah loogu talagalay oo si diyaar ah awood ugu leh sababidda dhimasho ama dhaawac jidheed oo halis ah. ● Hub, Qori Haysashada bistoolad, oo uu kamid yahay balse aan ku xaddidneyn qori kaas oo "loogu talagalay ama si markiiba ah loogu beddeli karo in uu rido qummac ficiil ka yimid walax qaraxda iyo wixii ah walax qaraxda, walax gubata, ama gaas sun ah." (Qaybta 921 ee Cinwaanka 18 ee Sharciga Maraykanka.) "Haysashada" waxa lagu qeexaa in uu koobsado, balse aan ku xaddidneyn, haysashada hub yaalla: (1) goob loogu talagalay arday sida khaanad ama miis, (2) ardayga laftiisu haysto ama hantidiisa ugu jirto (ardaygu ku haysto jidhkiisa, ardaygu ku haysto dharkiisa, ay u saaran tahay baabuurka), (3) uu gacanta ku hayo, ama galaangal u heli karo ama uu heli karo ardaygu; tusaale ahaan: ku qarsoon tahay hantida dugsiga. Hubka lala wareegay waxa gacanta loo geliyaa bilayska. <p>*Haddii habdahqanka uu ku lug leeyahay shaqaale, la xidhiidh Isuduwaha Dhaqanka Ardayda iyo Madaxa Shaqaalaha Degmada ee Masuulka ka ah Kormeerka dugsiga</p>	
<p>JAWAABAHA SUURAGALK A AH</p>	<p>Waxa dheeraad ka ah NOOCA I, II, iyo IIII jawaabaha</p> <ul style="list-style-type: none"> ● Dhaqanka Hagaajineed ● Wareegga Adkeynta ● Qiimeyina Habdhaqanka Shaqayneed/Qorshaha Taageerada Habdhaqan 	<ul style="list-style-type: none"> ● Qorshaha Ammaanka ● U Gudbi Isuduwaha Cinwaanka IX (ee dugsiga) sida ugu dhakhsaha badan ee macquulka ah ● La xidhiidh Xafiiska Cinwaanka IX ee degmada si uu u furi baadhis Cinwaanka IX ah
<p>SUURAGAL AH TAAGEEROO YIN HEER DEGMO AH</p>	<ul style="list-style-type: none"> ● Sinnaanta Qowmiyadeed Cadaaladda Bulsheed ● Kooxda Ka Jawaabidda Dhacdada Ku Salaysan Nacaybka ● Xafiiska Cinwaanka IX ee Degmada ● Guusha iyo Caafimaadka Ardayga ● Qareenka Qarsoodiga ah (VOA) 	<ul style="list-style-type: none"> ● Kulanka Kooxda Taageerada Ardayga ee ay la qaataan Taageerada Degmada (Lataliyeyaasha, Shaqaalaha Bulsheed, Maareeyaha Kiiska) ● Homefree/Raphael House ● Taageerooyin Degmo oo kale
<p>HAKIN</p>	<p>Haa KA EEG HAKINTA NOOCA II WIXII MACLUUMAAD AH EE DHEERAAD AH</p>	
<p>DHEGAYSI</p>	<p>Haa kadib marka laga la tashado Isuduwaha Dhaqanka Ardayda iyo Shaqaalaha Degmada ee masuulka ka ah kormeerka dugsiga.</p>	

<p>TIXGELI: *Haddii uu yahay mid soo</p>	<p>Dugsigu waxa uu isku dayey ugu yaraan 3 xeeladood oo kala duwan si uu uga</p>
---	--

<p>noqnoqda/Dabadheeraada, waxa aad bilawdaa inaad dabagasho habdhaqanka suuragal ahaana dib ugu noqo Kooxda Wax Ka Qabashada Ardayga. *Habdhaqan fogaansho/baxsasho? *Habdhaqanku ma yahay qayb kamid ah mushkilad caafimaad maskaxeed, jawaab musiiheed, ama naafanimo? *Gudbinta Marxaladda: 2/3 waxa ay habboonaan kartaa marka habdhaqanku yahay mid Dabadheeraada (joogto ah)</p>	<p>jawaabo habdhaqanka, iyo joogtanimada habdhaqanka iyo/ama wixii xadgudub ah ee ku abuura saameyn laxaad leh bulshada dugsiga ama arday uu leeyahay isku dhaf ah xadgudubyo Nooca II, iyo/ama Nooca III oo badan ah oo ku kulmay hal dhacdo, hakin ama dhegaysi ayaa la tixgelin karaa.</p>
--	---

HANDADAADO: marka arday ku handado xadgudub ama waxyeelleyn, masuulka ayaa tixgelin kara oo dabbiqi kara wax kamid ah kuwa soo socda:

- Si dhakhso ah in goobta fasalka looga saaro arday kasta oo ku handaday in uu dhaawacayo arday kale ama si daran u waxyeellaynayo hantida dugsiga.
- In lagu meeleeyo ardayga goob habdhaqannadu ay heli doonaan ihtimaam degdeg ah, oo ay ku jiraan, balse aan ku xaddidneyn, xafiiska maamulaha dugsiga, maamule ku xigeenka, kaaliyaha maamulaha, la taliyaha, ama cilminafsi-yaqaanka dugsiga ee liisanka ka haysta Guddiga Heerarka iyo Dhaqannada Macallimiinta ama xafiiska khabiir caafimaadka maskaxeed oo liisan haysta oo kasta.
- Kooxda Qiimaynta Ammaanka Habdhaqanka dugsiga waxa ay raaci doonaan baratokoolka qiimeynta handadaadda waxana ay qaban doonaan qiimeyn ammaanka habdhaqanka ah. Kooxda Qiimeynta Ammaanka Habdhaqanka waxa ay sameyn karaan qorshe ammaan, kaas oo ay waajib tahay in ardaygu raaco ama waxa suuragal ah in la mariyo tallaabo anshax-marin.

Masuulka, ka barbar shaqaynaya Masuulka Xafiiska Dhexe kaas oo kormeera kooxda dugsiga iyo degmada ee masuulka ka ah ka jawaabidda dhacdooyinka handadaadda, waxa ay haystaan 12 saacadood si ay uga ogaysiiyaan waalidiinta ama daryeelayaasha ilmaha la handaday taleefanka. Waa inay ku ogaysiiyaan waalidiinta ama daryeelayaasha dhacdada qoraal ahaan 24 saacadood gudahood iyaga si waafaqsan tilmaamaha degmada.

WALXAHA MAMNUUCA AH: hubku waa ka mamnuuc gudaha iyo meel u dhaw dugsiyadeena. Ardaydu kuma haysan karaan kumana adeegsan karaan qoryo ama mindiyo ama waxkasta oo u eeg ama loo adeegsado hub ahaan dugsiga. Erayada iyo ficillada handada ama cabsi gelin kara dadka kale lama ogola – xattaa ciyaar ama saaxiibada lagu ma odhan karo.

Ardaydu waa inaanay ku haysan agab khatar ah ama mamnuuc ah dugsiga, hantida, ama nashaadaadka dugsiga ee ay kamidka yihiin:

- **Khatar:** ay kamid yihiin, balse aan ku xaddidneyn qoryaha ama hubka aan dhabta ahayn, sawlajaanka, buufimada-basbaaska, bistooladaha korontada, feedhgashiyada birta ah, mindiyaha, iyo kuwo kale oo aan la qorin kuwaas oo loo adeegsado loona adeegsan handadaad toos ah.
- **Hub dilaa ah:** oo uu ku jiro, balse aan ku xaddidneyn, qoryo, mindiyo loo adeegsaday handadaad toos ah dhacdo ah dagaal (jidheed), feedhgashiyo bir ah, mindida xiirashada ee daabka dib loogu celiyo, hubka ah nooca nunchaku, bistooladaha korontada, sawlajaanka, iyo qalab kale oo loogu talagalay isla markaana awood u leh in uu dhaawac u geysto dad ama

hanti

- Walxaha qarxa
- Gaasta halista ah, xanuunka keena ee sunta ah
- Sunta
- Walxaha Beddela Muudhka (marka laga reebo daawooyinka loo qoray ardayga kuwaas oo ay tahay inay ku jiraan weel calaamadsan iyo daaweynada aan dhakhtar qorin);
- Qalabka loo adeegsado qaaditaanka, iibka ama adeegsiga daroogooyinka sharci darrada ah, oo ay ku jiraan balse aan ku xaddidneyn Juuls, qalimaanta vape ka, shiliishyada, iyo quruuradaha
- Hantida la xaday (Walxaha la xaday waxa loo gacan gelin doonaa mulkiilaha ama bilayska)
- Agabka ama qalabka khatar geliya ammaanka jidheed ama dadka ama hantida
- Xubin gaangistareed oo muujinaya calaamado ama qalab daroogo
- Walxaha, qalabka, calaamadaha muujinta ama qalabka daroogada kuwaas oo si cad u ah xadgudub qowmiyad ahaan, diin ahaan ama galmo ahaan xadgudub ah oo ay ku jiraan kuwa ku xidhan naadiyada firqooyinka ama kooxaha caddeystay ama ku dhaqma takoor ka dhan ah dadka oo ku salaysan da', midab, caqiido, naafanimo, xaalad guur, qaranka uu qofku kasoo jeedo, qowmiyad, diin, jinsi ama jiho galmeed
- Agabkeena ama walxaha ay mamnuuceen siyaasadaheena Guddida, Sharciyada Maamuleed ama xeerarka dugsiga
- Walxaha mamnuuca ah waxa qaadi doona oo hayn doona shaqaalaha dugsiga oo qaar walxo ah ayaa loo fasixi doonaa waalidka ardayga. Walxaha mamnuuca ah waxa burburin doona ama hayn doona Bilayska Portland.

TALLAABOYINKA ANSHAX-MARINEED EE KHAMRIGA/DAROOGADA

Heerka Xadgudubka Adeegsiga Maandooriyaha		Tallaabada Anshax-marineed iyo Shaqaalaha Masuulka ka ah Qabashada Kulanka/Dhegaysiga		Wax Ka Qabashooyinka Suuragalka ah
HEERKA A A	Adeegsiga Koowaad	<ul style="list-style-type: none"> ● Xanuunka Guriga U Dir ● Kulanka Heerka A 	Maamulka	<ul style="list-style-type: none"> ● Insight ● Qorshe Beddel ah
	Haysashada Koowaad	<ul style="list-style-type: none"> ● Hakin Inta Ka Hadhsan Maalinta ah ● Kulanka Heerka A 	Maamulka	<ul style="list-style-type: none"> ● Insight ● Qorshe Beddel ah
	Wareejinta Koowaad	<ul style="list-style-type: none"> ● Hakin Inta Ka Hadhsan Maalinta ah ● Kulanka Heerka A 	Maamulka	<ul style="list-style-type: none"> ● Insight ● Qorshe Beddel ah
	Adeegsiga ama Haysashada Labaad	<ul style="list-style-type: none"> ● Inta ka Hadhsan Maalinta iyo illaa hal maalin oo dheeraad ah oo Hakin ah 	Maamulka	<ul style="list-style-type: none"> ● Insight ● Qorshe Beddel ah

		<ul style="list-style-type: none"> • Kulanka Heerka A ee Labaad 		
HEERK A B	Qaybinta Koowaad	<ul style="list-style-type: none"> • Dhererka hakinta illaa kooxda dugsiga balse waa inay ka yaraataa 10 maalmood (waa in lagala tashadaa SS&H iyo MTSS) • Dhegaysi Anshax-marineed 	Sarkaal Dhegay si	<ul style="list-style-type: none"> • Eryid Dib Loo Dhegay • Eryid • SSC • Qorshe Beddel ah • SSC W/Qorshe Beddel ah
	Wareejinta Labaad	<ul style="list-style-type: none"> • Inta ka Hadhsan Maalinta iyo illaa hal maalin oo dheeraad ah oo Hakin ah iyo • Dhegaysi Anshax-marineed 	Sarkaal Dhegay si	<ul style="list-style-type: none"> • Eryid Dib Loo Dhegay • SSC • Qorshe Beddel ah • SSC W/Qorshe Beddel ah
	Adeegsiga ama Haysashada Saddexaad/Afraad	<ul style="list-style-type: none"> • Inta ka Hadhsan Maalinta iyo illaa hal maalin oo dheeraad ah oo Hakin ah • Dhegaysi Anshax-marineed <p>*Waxa ku jiri kara kulan lala yeesho CADC</p>	Sarkaal Dhegay si	<ul style="list-style-type: none"> • Eryid Dib U Dhacsan SSC • Qorshe Beddel ah • SSC W/Qorshe Beddel ah
HEERK A C	Qaybinta Labaad	<ul style="list-style-type: none"> • Dhererka hakinta ee illaa kooxda dugsiga waa inay ka yaraataa 10 maalmood (waa in lagala tashadaa SS&H iyo Dhaqanka Ardayda) • Dhegaysi Anshax-marineed 	Sarkaal Dhegay si	Eryid
	Wareejinta Saddexaad	<ul style="list-style-type: none"> • Dhererka hakinta ee illaa kooxda dugsiga waa inay ka yaraataa 10 maalmood (waa in lagala tashadaa SS&H iyo Dhaqanka Ardayda) • Dhegaysi Anshax-marineed 	Sarkaal Dhegay si	Eryid
	Adeegsiga ama Haysashada 5aad	<ul style="list-style-type: none"> • Dhererka hakinta ee illaa kooxda dugsiga waa inay ka yaraataa 10 maalmood (waa in lagala tashadaa SS&H iyo MTSS) • Dhegaysi Anshax-marineed 	Sarkaal Dhegay si	Eryid

HEERKA A	Fasalka Insight ama Qorshaha Beddelka ee dhererkiisu yahay 6 saacadood (tan waa in uu qoraa oo uu saxeexaa ardayga, waalidka ama xubin qoys iyo masuulka kormeeraya). Ardayga waxa laga reebayaa soo bandhigidda, tartanka iyo/ama in uu ku mettelo dugsiga tartannada, geemamka, soo bandhigitaanada, qoob-ka-ciyaarrada, iyo nashaadaadka kale ee lamid ah ee uu kafaala qaado dugsigu kuwaas oo dhaca dugsiga kadib ama ka dhaca meel ka baxsan xarunta muddo 14 maalmood ah.
HEERKA B/C	Kulan ayaa la muddeyn doonaa, ardaygana waxa laga reebayaa soo bandhigidda, tartanka iyo/ama in uu ku mettelo dugsiga tartannada, geemamka, soo bandhigitaanada, qoob-ka-ciyaarrada, iyo nashaadaadka kale ee lamid ah ee uu kafaala qaado dugsigu kuwaas oo dhaca dugsiga kadib ama ka dhaca meel ka baxsan xarunta muddo 28 maalin kaalendareed oo isku xiga oo ka bilaabmaya maalinta dhegaysiga.

Ogsoonow: Anshax-marinta loogu talagalay xadgudubka khamriga ama daroogada kale waa in loo sameeyo sida ku cad 4.30.022-AD.

Xadgudubyada adeegsiga Maandooriyaha ee Qowmiyadda iyo Isirka waa la dabagali doonaa oo la kormeeri doonaa, waxana lala wadaagi doonaa masuullada iyo Dadka kormeera dugsiga.

XEERKA 60 KA MAALMOOD: waxa loo baahan yahay in siiniyeerada laga joojiyo kaqaybqaadashada qabanqaabada xafladda qalinjabinta iyo hawlaha la xiriira haddii 60 maalin kaalendareed oo xiriir ah gudahood laga bilaabo maalinta dugsiga ugu dambaysa siiniyeerka lagu helo inuu ku kacay xadgudub keenaya in hakin lagu sameeyo saddex ama ka badan oo maalmood ama tallaabo anshaxmarin oo ka sii daran.

CANNABIDIOL (CBD): CBD iyo dhammaan maandooriyeyaasha laga sameeyey hemp iyo marijuana waxa ay ka kooban yihiin ugu yaraan xaddiyo aad u yar oo ah Tetrahydrocannabinol saameeya maskaxda ama habdhaqanka, ama THC, taas oo sharci darro u ah Oregon qofasta oo kayar da'da 21 in uu haysto ama adeegsado. Haysashada ama adeegsiga walxo kasta oo ka kooban CBD looma ogolaan doono hantida dugsiga ama munaasabada dugsiga waxana lagu mudan doonaa anshax-marinta hoos timaadda anshax-marinta PPS iyo [Siyaasadaha Deegaanada Waxbarasho ee Caafimaadka Qaba ee Ka Madhan Maandooriyaha](#) iyo [tilmaamaha maamuleed](#). Wixii ah maandooriyeyaal ee uu dhakhtarku qoro (oo ay kamid tahay CBD), ka eeg [Daawooyinka iyo Qoraallada Dhakhtarka](#).

TUBAAKADA: ardayda iyo dadka waaweyn looma ogola inay ku adeegsadaan, ku haystaan, ku iibiyaan, ama ku wareejiyaan qalabka iyo walxaha la xidhiidha tobaako ama tubaako/nikotiin dhismayaasha dugsiga, hantida dugsiga, gawaadhida loo adeegsado gaadiidka dugsiga iyo shaqada dugsiga la xidhiidha, iyo dhammaan nashaadaadka la xidhiidha dugsiga.

ANSHAX-MARINTA KA REEBISTA

HABRAACYADA HAKINTA: hakintu waxa ay ka dhigan tahay in arday aanu xaadiri karin dugsi ama nashaadaadka dugsi ee Dugsiyada Dadweynaha Portland. Hakitaanadu waxa ay socon karaan illaa toban maalin dugsiyeed.

Masuullada dhismuhu waa inay la xidhiidhaan madaxa shaqaalaha degmada ee masuulka ah kormeerka dugsi marka la tixgelinayo wax ka badan hal maalin oo hakin ah dhacdadiiba ama haddii ardaygu uu hore u maray 2 ama wax ka badan oo maalmood oo hakin ah. Masuullada dhismuhu waa inay la xidhiidhaan isuduwahooda dhaqanka ardayga iyo madaxa shaqaalaha degmada ee masuulka ka ah kormeerka dugsi haddii ay tixgelinayaan dhegaysi anshax-marin.

Kulan aan rasmi ahayn ayaa la qaban karaa oo u dhexeeya qof dugsi ah oo munaasab ah (hoggaamiye kooxeed, kaaliye masuul, maamule) iyo ardayga kahor inta aan ardayga la hakin iyada oo hakin degdeg ahi ay daruuri noqoto mooyee.

Hakin degdeg ah ayaa la dhaqan gelin karaa si loogu baadho dhacdo si buuxda. Ardayga waxa la hakin karaa inta lagu gudo jiro wakhtigan si loogu sahlo baadhistu inay dhammaato, si loo ilaaliyo isaga iyo kuwa kalaba ammaankooda, iyo si loo qorsheeyo ku soo noqoshadooda dugsi inay noqoto sida ugu ammaanka badan ee suuragalka ah.

Marka loo baadho, adeegyo turjumaad waa in la siiyo ardayda iyo/ama waalidiinta/daryeelayaasha.

Waalidiinta/daryeelayaasha waa la ogaysiinayaa marka ardayda la hakiyo. Kulan lala yeesho waalidka/daryeelaha waa in la qabtaa kahor inta aanu ardaygu kusoo noqon dugsi kadib muddo hakin ah si xal loogu raadiyo dhaqan xumada oo dib la iskula eego qaababka loo horumarinayo habdhaqanka ardayga. Waalidka/daryeeluhu waxa uu codsan karaa kulan uu la yeesho maamulaha ama wakiilkiisa si ay ugu sameeyaan qorshe hawleed ardayga si looga hortago dhacdooyin kale.

Ardayda waxa laga filayaa inay dhamaystiraan shaqada guri inta lagu gudo jiro hakin waxana ay codsan karaan laylisyadii ay ka maqnaayeen. Ardayga la hakiyey ma joogi karo hanti Dugsi Portland ama nashaadaadka uu kafaala qaaday dugsi.

Ardayga ama waalidka/daryeelaha doonaya in uu racfaan ka qaato hakin waa in uu la xidhiidho maamulaha si uu ugu qabanqaabiyo shir.

HABRAACYADA DHEGAYSIGA ANSHAX-MARINTA: wixii ah dhacdooyin halisnimada badan, dhegaysi ayaa la qabtaa ay ka qaybqaadanayaan waalidiinta/daryeelayaasha, ardayga, kooxda dugsi, iyo sarkaalka dhegaysi. Sarkaalka dhegaysiga ayaa go'aaminaya in arday la eryayo iyo muddada. Ardaydu sidoo kale waxa ay wajihi doonaan eryid dib loo dhigay. Inta lagu gudo jiro muddada eryidda dibka loo dhigay, ardayga waxa lagu waajibin karaa in uu soo dhamaystiro filashooyinka qaar, sida xaadiritaanka Xarunta Guusha Ardayga ama raacitaanka shuruudaha qorshe beddel ah si wax looga qabto sababaha habdhaqanka keenay dhegaysiga. Haddii ardaygu raaco qorshaha, markaa eryidda lama soo rogi doono. Haddii ay raaci waayaan qorshaha, markaa dhegaysi kale ayaa la qaban doonaa, ardaygana waa la eryi karaa.

- Arday waa la hakin karaa sugaya dhegaysi anshax-marineed.
- Eryiddu waxa ay ka dhigan tahay ardaygu inaanu soo xaadiri karin dugsi ama nashaadaadka dugsi Dugsi Dedweyne Portland oo kasta muddo ah illaa sanad kaalendareed dhamaystiran. Ardayda PK-5 lama eryi karo iyada oo duruufuhu waafaqaan mooyee heerarka sharciga Gobolka.

- Xadgudubyada qorigu waxa ay waajibiyaan eryid ka bilaabata taariikhda dhegaysiga oo ah illaa sanad kaalendareed dhamaystiran.
- Marka loo baahdo, adeegyo turjumaad waa in la siiyo ardayda iyo/ama waalidiinta/daryeelayaasha.
- Ardayga la eryay ma iman karo wax ah hanti Dugsi Dadweyne Portlan ama nashaadaadka uu kafaala qaaday dugsi.
- Arday ama waalid/daryeele waxa uu racfaan ka qaadan karaa wixii ah go'aan eryid ama eryid dib loo dhigay.

ANSHAX-MARINTA ARDAYDA NAAFADA AH: xaaladaha tallaabada anshax-marinta ay ku jirto hakin ama eryid, masuulka dugsi waa in uu u ogaysiiyaa waalidiinta/daryeelayaasha/wakiillada qaab lamid ah qaabkii ardayda aan naafada ahayn. Waaxda Waxbarashada Gaarka ah ayaa ogaysiin doonta waalidiinta/daryeelayaasha wixii ah kulanno waxbarasho gaar ah. Waxa ay marayaan habraacyada anshax-marinta si loo dardargeliyo isbeddelada habdhaqan ee togan isla markaana loo ilaaliyo kuwa kale.

Wixii ah ardayda qaadata IEP ga, qorshe Qaybta 504 ah oo rasmi ah, ama kuwa loo xaddiday gudbin waxbarashada gaarka ah, habraacyo dheeraad ah ayaa loo baahan karaa in la raaco si loo go'aamiyo in ardayga loo hakin karo sababa la xidhiidha anshax-marin.

HABRAACYADA: waa inay raacaan ardayda naafada ah ama qaata qorshayaasha Qaybta 504 ah oo rasmi ah kuwaas oo la hakiyey wax ka badan toban (10) maalmood sanad dugsiyeed, wixii ah hakitaanada dheeraadka ah ee ah illaa toban (10) maalin dugsiyeed oo aan qaab isugu xigxigin, uu ku mutaystay falal kala gaar ah oo dhaqan xumo ah, kuwaas oo ahaa kuwo gaar ah oo soo noqnoqda, ama haddii ardayga loo tixgelinayo eryid. Tixraac: [4.30.025-AD](#).

HANNAANADA RACFAANNADA

KA DOODISTA HAKIN: Ka Doodista Hakin: Ardayga ama waalidka/daryeelaha waxa uu xaq u leeyahay in uu ka doodo wixii hakin ah. Masuullada waxa looga baahan yahay inay ku wargeliyaan waalidiinta iyo ardayda xuquuqdooda racfaanka. a) Ardayga ama waalidka/daryeelaha waxa uu ka doodi karaahakinta ugu horeyn isaga oo codsanaya shir qoran oo uu la yeesho maamulaha.

- Maamuluhu wuxuu siin doonaa qoyska jawaab qoran saddex (3) maalin dugsiyeed gudahood marka uu helo codsiga waalidka/daryeelaha.
- Haddii maamuluhu uu ahaa go'aan-qaataha, qoysku wuxuu u gudbin karaa rafcaan qoraal ah oo ka dhan ah go'aanka shaqaalaha degmada ee ka masuulka ah kormeerista dugsi ardaygu dhigto shan (5) maalmood gudahood go'aanka maamuluhu markuu soo baxay.
- Shaqaalaha sare ee degmada ayaa dib u eegi doona diiwaanka oo bixin doona jawaab qoraal ah saddex (3) maalmood gudahood. Shaqaalaha sare ee Degmada go'aankooda lagama daba tegi karo.

RACFAAN KA QAADASHADA ERYID AMA ERYID DIB LOO DHIGAY: rafcaan ka qaadashada Eryidda ama Eryidda Dib Loo Dhigay: Arday ama waalid/masuul ayey dhici kartaa inuu rafcaan ka qaato go'aan dhegaysi eryid ama eryid dib loo dhigay isagoo u qaadanaya Xafiiska Kormeeraha Guud shan (5) maalin dugsiyeed gudahood oo ka bilaabata markii go'aanku dhacay.

GO'AAN GAADHIS: Go'aan Gaadhis: Saddex (3) maalin dugsiyeed gudahood, sarkaalka dhegaysiga racfaanada go'aankiisa waxa uu ku saleyn doonaa raajixnimada caddeynta waxana uu dooran karaa in uu taageero, qaabeeyo, ama beddelo go'aanka. Haddii go'aanku yahay in la dhimo eryidda 365-maalmood ah ee Qoriga ee waajibka ah, go'aanka sarkaalka dhegaysiga waxa talo

ahaan loogu gudbinayaa Kormeeraha Guud, kaas oo keligiis awood u leh qaabaynadaas.

WARAAQDA NATIJOYINKA DHEGAYSIGA: dugsiyu waxa uu ku ogaysiiyey waalidka/daryeelaha ardayga qoraal ahaan go'aanka. Ogaysiisku waxa uu sheegi doonaa tallaabooyinka racfaanka dhegaysi ama go'aan.

RACFAANKA ERYIDDA EE GUDDIGA AGAASIMAYAASHA: arday ama waalid/daryeele waxa uu racfaan ka qaadan karaa eryid isaga oo u qaadanaya Guddiga Agaasimayaasha muddo (10) maalin dugsiyeed ah gudahood oo ka bilaabmaya go'aanka uu gaadhay Kormeeraha Guud ama Wakiilkiisu. Codsiiyo ayaa loo diraa Xafiiska Kormeeraha Guud.

RACFAANKA GO'AANKA CINWAANKA IX: racfaanada laga qaato go'aanada Cinwaanka IX waxa waajib ah inay waafaqsan yihiin Takoorka iyo Dhibaataaynta Galmada Ku Saaysan ee Ardayda Ka Dhex Dhaca ee Dhibtaaynta Galmeed ah ee 4.30.072-AD.

QEEXITAANO

- **Xeerka 60 ka Maalmood:** waxa loo baahan yahay in siiniyeerada laga joojiyo kaqaybqaadashada qabanqaabada xafladda qalinjabinta iyo hawlaha la xiriira haddii 60 maalin kaalendareed oo xiriir ah gudahood laga bilaabo maalinta dugsiya ugu dambaysa siiniyeerka, lagu helo inuu ku kacay xadgudub keenaya in hakin lagu sameeyo saddex ama ka badan oo maalmood ama tallaabo anshaxmarin oo ka sii daran.
- **Ogolaanshaha Aqbalaadda ah:** waxa loo bixiyaa si xornimo leh, oo laba geesood ah, oo daacad ah, oo joogto ah, waxana laga noqon karaa wakhti kasta sabab kasta oo keenta. Ogolaanshaha hal isdhexgal loogama qiyaas qaadanayo ogolaanshaha isdhexgallo kale. Ogolaanshaha lama bixin karo marka daroogooyin ama khamri maanku ku doorsan yahay ama marka handadaad, qasab, ama cabsigelini ay jirto. Marka ogolaanshaha aqbalaadda ah lagu daro xidhiidhada galmeed ee caafimaadka qaba, waxa uu yareeyaa saameynta iyo cawaaqibta cadaadista galmada. Filashadani waxa ay waafaqsan tahay Heerarka Waxbarashada Caafimaadka ee Waaxda Oregon.
- **Racfaanka:** ardayga iyo qoyskiisu waxa ay xaq u leeyihiin inay racfaan ka qaataan natiijada dhegaysiga. Tilmaamaha ku aaddan sida loo sameeyo racfaan waxa ay ku jiraan waraaqda natiijooyinka dhegaysiga.
- **Nidaamka Qiimeynta Ammaanka Habdhaqanka (BSAS):** hannaan qeexan oo lagu qiimeynayo, qorshaynayo, oo lagu taageerayo ardayda muujiya habdhaqano handadaad leh. Masuulladu waxa ay la xidhiidhi doonaan Isduwaha Qiimeynta Ammaanka Habdhaqanka waxana ay raaci doonaan Habraacyada Qiimeynta Ammaanka Habdhaqanka markasta oo ay ka wajaahan habdhaqano handadaad ah ardayda.
- **Dhacdada Eexda ah:** "Dhacdada Eexda ah" waxa ay ka dhigan tahay cabiraadda cadaawadeed ee qof ee ku wajahan qof kale, ee la xidhiidha qowmiyadda, midabka, isirka, diinta, aqoonsiga jinsiyeed, jihada galmeed, naafanimada, ama qaranka uu kasoo jeedo ee la ogaaday ee qofka taas oo baadhis ama xukun faldembiyeed aanu suuragal ahayn ama aanu habooneyn. Dhacdooyinka eexda waxa kamid noqon kara luuqadda ama habdhaqanka yasitaanka ah ee ku wajahan ama ku saabsan wax kamid ah kooxaha qaybaha bulsheed ee hore.

- **CADC:** Lataliyaha Khamriga iyo Daroogada ee Khabiirka ah
- **Eryidda Dib U Dhacsan:** waa natiijo suuragal ah oo kasoo bixi karta dhegaysi anshax-marin. Waa muddo ah taageero iyo qaabdhismeed la xoojiyey oo loogu talagalay arday. Qorshe ayaa loo dejin doonaa in lagaga caawiyo inay noqdaan kuwo u guulaysta sida ugu badan ee suuragalka ah dugsiga. Haddii ay raaci waayaan qorshaha, ama haddii ay galaan xadgudub halis ah oo cusub, dhegaysi kale ayaa la qaban doonaa si loo go'aamiyo tallaabooyinka xiga. Eryidda dib u dhacsan badanaaba waxa ay socotaa illaa dhammaadka simistarka hadda ama ka xiga, iyada oo ku xidhan heerka taageerada loo baahan yahay wakhtiga uu sanadka ka ahaa markii dhegaysiga la qabtay.
- **Qaybinta:** xayeysiinta, u bandhigidda iib ahaan, iibka, qalabaynta, baayacmushtarka, ama isweydaarsiga maandooriyaha, ama fududaynta isweydaarsiga walxaha si loo helo faa'iido lacageed, faa'iido bulsheed, alaab, iyo/ama alaab, iwm. Waxa kamid ah ardayda lagu qabto iyaga oo haysta xaddi badan oo maandooriye ah ama qalabka maandooriyaha oo loo tixgelin karo inay aad uga badan tahay adeegga shakhsiyeed. Tallaabooyinkani waxa ay khuseeyaan Dugsiyada PPS, munaasabadaha, ama barnaamijyada, oo ay kamid yihiin Isku Xigxigitaanka Anshax-marinta.
- **Anshax-marinta Ka Saarista:** tallaabada anshax-marinta taas oo lagaga saaro arday waxdhigista.
- **Eryid:** waxa uu u diidaa ardayga xaqa xaadiritaanka degmo dugsiyeed ama barnaamij kasta, oo ay kamid yihiin dhammaan fasallada iyo nashaadaadka dugsiga, ama inay yimaaddaan wax hanti degmeed ah illaa muddo hal sanad kaalendereed ah.
- **Hadalka Nacaybka ah:** cabiraadda colaadeed ee ah qoraalka, hadalka, muuqaalka, ama calaamadda ee ku salaysan qowmiyadda, midabka, diinta, aqoonsiga jinsiyeed, jihada galmeed, naafanimada, ama qaranka uu qofku kasoo jeedo.
- **Dhegaysiga:** kulan rasmi ah oo dib loogu eegayo macluumaadka la xidhiidha habdhaqanka laga shakisan yahay isla markaana lagu gaadhayo go'aan la xidhiidha tallaabo anshax-marineed.
- **Sarkaalka dhegaysiga:** masuul degmeed kaas oo haysta booska Sarkaalka Dhegaysiga.
- **Barnaamijka Waxbarashada Gaarka ah :** sidoo kale loo yaqaano IEP, waa dukuminti loo sameeyo ilme dugsiga dadweynaha ah oo kasta kaas oo loo arko in uu u qalmo waxbarasho gaar ah. Waxa dib loogu eegaa qaab sanadle ah, marmarna waa laga badiyaa, waxana dib u eega kooxda IEP ga, oo ay kamid yihiin waalidka/daryeelaha ilmaha, masuullada dugsiga yo shaqaalaha degmada.
- **Kulanka Heerka A:** inta lagu gudo jiro xadgudub Heerka A ah, dugsiyadu waxa ay adeegsan doonaan kulan anshax-marin oo masuul dugsi ayaa fududeyn doona kuwan. Yoolka kulan Heerka A ah waxa weeyi in lagu xidho ardayda wax ka qabashada ku habboon, sida, Insight ama Qorshe Beddel ah.
- **Carqaladeynta Jidheed ee laxaadka lehee Deegaanka Waxbarasheed:** habdhaqannada si laxaad leh u carqaladeeya waxdhigista ama awoodda xubinta shaqaaluhu u leedahay inay joogtayso fasal deggan isla markaana xaqiijiso ammaanka ardayga.
- **Go'aaminta in Habdhaqanka ay Sababtay Naafanimadu:** Go'aaminta in Habdhaqanka ay Sababtay Naafanimadu waa tijaabo ay sameeyaan kooxda IEP ga ama 504 ka ardayga si loo

go'aamiyo in habdhaqanka keenay tallaabo anshax-marin oo suuragal ah uu yahay mid ay si toos ah u sababtay naafanimada u qalanta ee ardayga ama uu sababay ku guurdarreysiga dugsiga ee in uu si buuxda u dhaqangeliyo IEP ga ama qorshaha 504. Haddii la ogaado in naafanimadu sababtay habdhaqanka waxa ay taasi keeni kartaa in ardaygu aanu marin anshax-marin ka saarid oo dheeraad ah, waxana dhici karta in uu keeno cusboonaysiin lagu sameeyo IEP giisa ama Qorshihiisa 504 ka

- **Qalabka Maandooriyaha:** qalab, alaab, ama adawaad kasta oo loogu talagalay ama loo qaabaystay in lagu sameeyo, adeegsado, ama lagu dahaadho maandooriye. Tusaalayaasha qalabka daroogada waxa kamid ah, balse aan ku xaddidneyn: tuumbooyinka, irbadaha, shayga qiijinta iyo Nidaamyada Gaadhsiin Nuugis oo kale, malqaacadaha yaryar, shayga la isaga qabto waxa la qiijinayo, tuumbooyinka lagu qiijiyo daroogada, iyo waraaqaha sigaarka, kuwo kalana waa jiraan.
- **Dagaal jidheed oo keena waxyeello:** dhaqan aan kama' ahayn oo ku sababa waxyeello jidheed oo halis ah arday ama shaqaale dugsiyeed.
- **Raajixnimada caddeynta:** heer caddeyneed oo uu adeegsado sarkaalka dhegaysiyada si uu ugu miisaamo macluumaadka uu helay intii uu ku gudo jirey dhegaysi. Heerka miisaankani waa "Suuragalnimadeedu inay ka dhawdahay Suuragalnimo la'aanteeda." Tani waa culays hooseeya oo ay leedahay caddeytu marka loo eego ta lagu adeegsado nidaamkeeda maxkamadeed, taas oo ah "Ka Baxsan Shakiga Macquulka ah".
- **Qaybta Qorshaha 504:** qorshe fudaydineed oo loogu talagalay ilmaha dugsi dadweyne ku jira ee naafada ah waxa loo sameeyey si loo xaqiijo in ilmuhu helo fudaydino si uu galaangal ugu helo isla markaana uga qaybqaato deegaanka waxbarashada.
- **Waxyeellada Jidheed ee Halista ah:** daciifnimo ku timaadda xaaladda jidheed ama xanuun laxaad leh oo dabadheer.
- **Hannaanka Guddiga Jawaabta Dhacdada Galmeed (SIRC):** degmadu waxa ay leedahay hannaan qeexan oo ay ku qiimayso, kuna taageerto ardayda muujiya habdhaqano galmeed oo mushklad ah, caadi ahaan goob K-5 ah. Masuulladu waa inay la xidhiidhaan Isuduwe SIRC ah markasta oo ay wajahaan habdhaqan dabeecad galmeed oo dhibaato leh.
- **Maandooriye:** tan waxa kamid ah dhammaan walxaha muudhka-beddela ama koobiyadeeda, oo ay kamid yihiin khamriga ama daawooyinka aan dhakhtar u qorin ardayga ama loo adeegsaday qaab aan waafaqsaneyn qoraalka dhakhtarka.
- **Waxbarashada maandooriyuhu-daciifiyay:** hoos u dhaca ku yimaad waxbarashada, ka qaybqaadashada, ama habdhaqanka ardayga taas oo ay sababto inay jidhkiisa ku jiraan daroogooyin ama khamri ama hadhaagooda.
- **Hawlaha La Xidhiidha-Maandooriyaha:** ficillada ay ku jiraan balse aan ku xaddidneyn adeegsiga, qaybinta, iibka, ama haysashada maandooriyeyaasha, oo ay kamid yihiin daroogooyinka, khamriga, ama qalabka daroogada; waxbarashada maandooriyuhu-daciifiyey, habdhaqanka uu saameeyey-maandooriyuhu; iyo ficil kasta oo kaalmeynaya hawshaas. (Ogsoonow: masuulladu waa inay la xidhiidhaan isuduwe anshax-marin degmeed kahor inta aanay la xidhiidhin bilayska.)
- **Carqaladeynta Laxaadka leh ee Deegaanka Waxbarashada:** carqaladeynta laxaadka leh ee lagu sameeyo shaqada dugsiga ama taabashada xuquuqda ardayda kale. Si laxaad leh u rabshidda awoodda waxbarasho ee ardayda kale.

- **Hakinta, dugsi-ga-dhexdiisa:** waxa uu si ku meelgaadh ah ugu diidaa arday xaqa xaadiritaanka fasallo jadwalaysan oo taas beddelkeeda waxa lagu amraa in uu xaadiro barnaamij ama ka qaybqaato hawlo waxbarasho oo kale oo dugsi-ga-dhexdiisa ah muddo ah illaa shan (5) maalin dugsiyeed oo isku xiga
- **Hakinta, ka-baxsan-dugsi-ga:** waxa uu si ku meelgaadh ah ugu diidaa arday xaqa ah in uu xaadiro dugsi, oo ay kamid yihiin dhammaan fasallada iyo hawlaha dugsi-ga iyo in uu yimaaddo hanti degmeed oo kasta, muddo ah illaa toban (10) maalin dugsiyeed oo isku xiga.
- **Calaamad Nacayb:** "Calaamad Nacayb" waxa ay ka dhigan tahay calaamad, sawir, ama walax muujisa cadaawad ku salaysan qowmiyad, diin, aqoonsi jinsiyeed, jiho galmeed, naafanimo, ama qaranka uu qofku kasoo jeedo , oo ay kamid yihiin balse aan ku xaddidneyn wax ah calaamadaha xadhiga daldalaadda, calaamadda Naasiga, ama calan-dagaal kooxeed ee ku jira Database ka Calaamadaha Naceybka ee Hate on Display yaana iska leh bandhigga. Taasi waxa ay macquul ahaan u badan tahay inay ku sababto rabshadeyn laxaad leh ama carqaladeyn jidheed nashaadaadka dugsi-ga; ama uu carqaladeeyo xuquuqda ardayda inay si buuxda galaangal ugu helaan adeegyada, nashaadaadka, iyo fursadaha uu bixiyo dugsi ama barnaamij; ama waxa ay u badan tahay in uu abuurto deegaan waxbarasheed oo colaad leh kaas oo carqaladeeya badqabka ardayga ee nafsiiyeed iyo shucuureed.
- **Handadaad Sababaysa Ka Cabdi Waxyeello** tallaabo jidheed, hadal, qoraal, ama elegtaroonig taas oo si degdeg ah u abuurta ka baqasho dhaawac iyada oo aan la muujin hub iyo iyada oo aan la marsiin dhibbanaha dagaal jidheed oo dhab ah.
- **Wareejinta:** kula wadaagista maandooriye arday kale goob ama xaalad bulsheed, gaar ahaan si aan qorshaysneyn; tusaalayaasha waxa kamid ah qalin vape gareyn in la isku la wadaaqo musqusha, in khamri lagu siiyo arday kale ciyaar ama munaasab, iwm.
- **Hannaanka Ku Dhisan Raadka Masiibada:** waxa loogu talagalay inay noqoto jawaab bulsheed oo lagu taageerayo ardayda musiiibo la kulmay iyo qoysaskooda. Tan waxa kamid ah siyaasadaha iyo dhaqanada abuurto deegaan dugsi oo ammaan ah iyo waxbarasho xirfadeed oo la xidhiidha astaamaha iyo calaamadaha raadka musiiibada, dardargeliya dulqaadka iyo badqabka ardayda dhexdooda, qoysaskooda, iyo shaqaalaha, isla markaana yareeya soo noqoshada raadka musiiibada.

SIYAASADAHA PORTLAND	DUGSIYADA	DADWEYNAHA	SHARCIYADA HADDA:
-------------------------	-----------	------------	-------------------

Si aad u hesho macluumaad siyaasadeed waxa aad tagtaa PPS.net

- [1.80.020-P Siyaasadda Lidka-Takoorka/Lidka-Dhibaataynta](#)
- [2.10.010-P Siyaasadda Sinnaanta Waxbarashada Qowmiyadeed](#)
- [4.30.010-P Dhaqanka iyo Anshax-marinta Ardayga](#)
- [4.30.011-AD Dhaqanka iyo Anshax-marinta AD](#)
- [4.30.012-P Heerarka Dirayska iyo Lebiska ee Dhaqanka - Ardayga](#)
- [4.30.013-AD Sharciga Dirayska Ardayga](#)
- [4.30.020-AD Habraacyada Anshax-marinta Ardayga](#)
- [4.30.021-AD Habraacyada Hakinta iyo Eryidda ee Ardayga](#)
- [4.30.023-P Deegaanada Waxbarashada ee Caafimaadka Qaba ee Ka Madhan Maandooriyaha](#)
- [4.30.022-AD Deegaanada Waxbarasho ee Caafimaadka Badan ee Ka Madhan Daroogada ee AD](#)
- [4.30.025-AD Anshax-marinta Ardayda Naafada ah](#)
- [4.30.040-P Xuquuqda Ardayda ee La Xidhiidha Raadinada Qof iyo Hanti](#) o
- [4.30.041-AD Raadinada Arday iyo Hantidooda; La Tacaalidda Walxaha Mamnuuca ah](#)
- [4.30.060-P Siyaasadda Lidka-Dhibaataynta iyo Xadgudubka Sheekada Jaceyl ee Dhawryo Toban Jirrada](#)
- [4.30.061-AD Ardayda ah Jinsi-beddelka, Jinsi-laawaha iyo kuwa ah Jinsiga Gaarka ah](#)
- [4.30.071-AD Habraacyada iyo Kahortagga Dhibaataynta, Xadgudubka Galmeed, iyo Xadgudubka Sheekada Jaceyl ee Dhawryo Toban Jirrada - Ardayda](#)
- [4.30.072-AD Takoorka iyo Dhibaataynta Ku Salaysan-Galmada ee Ardayda Ka Dhex Dhaca ee Cinwaanka IX](#)
- [4.50.060-AD Qabashada iyo Gooni-u-saaridda Ardayga](#)
- [8.60.040-P Adeegsiga Tiknoolajiyadda ee Masuuliyadda Leh](#)
- [8.60.041-AD Siyaasadda Adeegsiga Tiknoolajiyadda Degmeed ee Ardayga iyo Shaqaalaha \(AUP\)](#)
- [8.60.045-AD Adeegsiga iyo Filashooyinka Baraha Bulshada ee Ardayda](#)

Sharciyada Federaalka

- [Cinwaanka IX ee Wax Ka Beddellada Waxbarasheed ee 1972, 20 U.S.C. 1681 et seq.](#)
- [Sharciga Ameerikaanka Naafada ah ee 1990, 42 U.S.C. 12101 et seq.](#)
- [20 Sharciga Maraykanka § 7961 - Shuruudaha qori-haysasho la'aanta](#)

Sharciyada Gobolka Oregon:

- [SB 52: Sharciga Adi](#)
- [ORS 339.240 Shuruudaha Dhaqanka, Anshax-marinta, iyo Xuquuqda Ardayga](#)
- [ORS 339.250 Waajiba Ardayga Ka Saaran U Hoggaansanka Shuruudaha](#)
- [ORS 339.252 Ilmaha Naafada ah Waxa uu Sii Wadayaa Uqalmitaanka Waxbarasho Dadweyne oo Habboon oo Bilaash ah haddii Loo Saaro Sababo Anshax-marin](#)
- [ORS 339.270 Qiimeynta Qiimeyaasha Waxyeellada Hantida Dugsiga ee Lagu Soo Rogayo Ardayga Masuulka ah ama Waalidiinta ama daryeelaha](#)

Fadlan adeegso koodhka QR ka ee hoose si aad Ra'yi-celin uga hesho

Buugyaha Xuquuqda iyo Masuuliyadaha Ardayda.



Degmada waxa ka go'an fursado loo siman yahay iyo takoor la'aan inay ka hirgeliso dhamaan hawlaheeda waxbarasheed iyo shaqaalayn. Degmadu waxa ay mamnuucdaa takoorka ku salaysan qowmiyadda; qaranka ama isirka qofku kasoo jeedo; midabka; jinsiga; diinta; da'da; jihada galmeed; cabiraadda ama aqoonsiga jinsiyeed; uurka; xaaladda guur; xaaladda ciidan hore; xaalad qoys; xaalad dhaqaale ama il dakhli; naafanimo maskaxeed ama jidheed ama naafanimo la qiyaastay; ama adeeg milatari oo la malaystay ama dhab ah.

Dugsiyada Dadweynaha Portland

501 N. Dixon Street

Portland, OR 97227

(503) 916-2000

